

Adeeg Bixiyaha

OR PTC DCI
NOOCA 2.1



Mawduucyada

Afeef	5
Waa maxay Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV)?	5
Waa maxay OR PTC DCI?	5
Erayada Guud	5
Gelitaanka Barta Webseedka OR PTC DCI	7
Xogta Ciwaanka isticmaalaha iyo Lambarka Sirta	7
Waa maxay ciwaankayga isticmaalaha?	7
Waa maxay Lambarkayga Sirta?	8
Xeerarka Lambarka Sirta	8
Gelitaanka	9
Gelitaanka Marka Koobaad	10
Su'aasha Ammaanka	11
Boostiyada Wararka	12
Luuqada aad Door-bideyso	13
Dookhyada Diiwaan gelinta Wakhtiga	14
Abka Moobilka OR PTC DCI	14
Soo degsashada Abka Moobilka OR PTC DCI	15
Gelitaanka Abka Moobilka OR PTC DCI	17
Boostiyada Wararka Abka Moobilka	19
Bogga hore ee Abka Moobilka	20
Dookhyada Abka Moobilka	21
Qaybta Fariimaha Abka Moobilka	22
Diiwaannada Abka Moobilka	23
Abka Moobilka: Xaqiiji gelitaanka	25
Abka Moobilka: Diid Gelitaanka	26
Luuqada aad Door-bideyso ee Abka Moobilka	27
Ka bixida Abka Moobilka	28
Gelitaannada Waqtigooda la sameeyo OR PTC DCI	29
Xaqiijinta Saacada Ka Bixida ee Abka Moobilka	31
Saacada Ka Bixida Abka Moobilka	35



Su'aalaha iyo Jawaabaha Abka Moobilka OR PTC DCI.....	36
Abka Moobilka OR PTC DCI oo Oflayn ah.....	38
Bilaabida Adeegsiga Abka Moobilka Oflaynka ah	38
Ma ka diiwaan gelin karaa wax ka badan hal aalad Abka Moobilka ee Oflaynka ah?	38
Aaladeydu waa diiwaan gashan tahay. Maxaa xiga?.....	39
Maxaad Ku samayn Kartaa Abka Moobilka Oflaynka ah?.....	39
Muddo Intee dhan ayaad Oflayn Ahaan Kartaa?	40
Maxaa dhacaaya marka aan galo abka moobilka marka aan ku soo laabto oonlaynka?.....	41
Waxaan wajahaya cilada xiriirka internetka; maxay tahay inaan sameeyo?	41
Cilad Bixinta Qaybta Oflaynka ah	42
Laylaynka OR PTC DCI.....	43
Xogta la Galsho isla marka ay dhacayso Laylaynka OR PTC DCI	43
Laynlaynka – Saacada Gelitaanka Shaqada.....	44
Laynlaynka – Saacada Ka bixida Shaqada	44
Gelitaannada xogta Taariikh hore ee Laylaynka OR PTC DCI	45
Su'aalaha iyo Jawaabaha Laylaynka OR PTC DCI.....	46
OR PTC DCI Fob.....	48
Adeegsiga OR PTC DCI Fob	49
Xaashida Wakhtiga ee OR PTC DCI Fob	49
Su'aalaha iyo Jawaabaha OR PTC DCI Fob.....	50
Barta Webseedka OR PTC DCI	51
Gelitaanka Barta Webseedka OR PTC DCI.....	52
Dulmarka Bogga hore ee Barta Webseedka OR PTC DCI.....	54
Sida loo adeegsado Galka Ogolaanshaha	56
Ciwaannada Barta Webseedka OR PTC DCI	57
Guudmadka Qaybta Fariimaha ee Barta Webseedka OR PTC DCI.....	57
Barta Webseedka OR PTC DCI Su'aal iyo Jawaab.....	60
Ku darista Gelitaan Barta Webseedka OR PTC DCI	61
Gelitaanka ku darista Fob Barta Webseedka.....	61
Gelitaannada Fob - Tookeenno Khalad ah.....	63
Ku Darista Gelitaannada Taariikhda Barta Gelitaanka.....	63



Koodhadhka Sababta:	65
Ku darista Koodhka Sababta	65
Si aad u Xaqiijiso Waxaad ku dartay Koodhka Sababta	65
Si looga Saaro Koodhka Sababta.....	66
Gelitaannada Taariikhda - Su'aal iyo Jawaab	67
Gelitaannada Ku dairista Badka Barta Webseedka OR PTC DCI.....	69
Barta Webseedka OR PTC DCI Ka fiiri Gelitaan Bogga Hore.....	71
Webseedka Moobilka OR PTC DCI	71
Gelitaanka Webseedka Moobilka OR PTC DCI	71
Gelitaanka Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI	72
Ku darista Gelitanka Xirmada Cusub ee Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI.....	73
Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI Arag, Xaqiiji, Diid Gelitaanka	75
Fariimaha/Sanduuqa fariimaha ee Webseedka Moobilka OR PTC DCI.....	76
Webseedka Moobilka OR PTC DCI Gelitanka Badka	77
Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI sida loogu Daro Gelitaan Taariikheed	81
Webseedka Buuxa ee Abka Moobilka OR PTC DCI.....	85
Webseedka Buuxa ee Abka Moobilka OR PTC DCI Wax ka Badel Gelitaan.....	85
Webseedka Buuxa ee Abka Moobilka OR PTC DCI Gelitanka Maylasha.....	89
Webseedka Buuxa ee Abka Moobilka OR PTC DCI Sida Loo gasho Gelitaanka Taariikhda.....	93
Sixitaannada Gelitaanka	97
Wax ka badelka Gelitaanka.....	97
Adeeg bixiyaasha ayaa masuul ka ah gelinta iyo sixida wakhtigooda gaarka ah ee aalada OR PTC DCI.....	97
Adeeg bixiyaashu Waa inay La xiriiraan Xafiiska Maxaliga si looga caawiyo Wax ka Badelka Gelitaanka.....	97
Gelista Gelitaankaaga	98
Si aad wax Uga badesho Gelitaanka	99
Diido Gelitaanka	101
Gelitaannada aan La Xaqiijin	101
Su'aalaha iyo Jawaabaha Gelitaanka OR PTC DCI	103
Settings-ka Isticmaalaha	104



Badel Lambarka Furaha Sirta	104
Iloobay Lambarka Sirta	106
Dib u beddel Lambarka Sirta	108
Ku dar BIIN	111
Beddel BIINKA	112
Beddel Su'aalaha Amaanka	114
Badel Imaylka	115
Xaqiiji Lambarka Taleefanka Moobilka	117
Badel Magaca Isticmaalaha	120
Taageerada	121
Miiska Caawimaada ee DCI (oo la heli karo 24/7, marka laga reebo xiliyada fasaxa)	122
Taageerada PTC.....	122
Xarunta Caawimaada DCI.....	122
Su'aalaha iyo Jawaabaha guud	123

Afeef

Mawduucyada ku qoran dukumiintigaan waxaa loogu talo galay adeeg bixiyaasha ayadoo la adeegsanaayo nidaamka OR PTC DCI.

Waa maxay Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV)?

Dawlada federaalka ah ayaa ka dooneysa goballada inay si elektarooniga ah uruuriyaan xog gaar ah marka adeegyada daryeelka gaarka ah la baxsho, tan ayaa ka imaanaysa Sharciga Cures ee Qarniga 21aad. Tan waxaa la yiraahdaa Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV).

Xogta soo socota ayaa la uruuriyaa booqasho kasta:

- Taariikhda adeegga la baxshay
- Waqtiga Biloowga/Dhammaadka
- Nooca adeegga
- Goobta adeegga
- Shaashada hore ayaa soo baxaysa; dooro Kudar Gelitaan
- Magaca macmiilka adeegga helaaya




Waa maxay OR PTC DCI?

- OR PTC DCI waxay u taagan tahay Oregon Provider Time Capture Direct Care Innovations.
- Direct Care Innovations (DCI) waa aalad elektaroonig ah oo xisaabisa waqtiga.
- Waxaad u adeegsan doontaa OR PTC DCI inaad geliso waqtiga aad shaqaysay iyo badka aad socotay.
- Macmiilka ayaa u adeegsan kara OR PTC DCI inuu eego uuna saxiixo waqtiga aad shaqeysay. Talaabadan qasab maaha, waa ikhtiyaarka macmiilka haddii uu doonaayo inuu akhriyo uuna saxiixo waqtiga aad shaqaysay.

Erayada Guud

- **Ogolaanshaha:** Waxay qeexaysaa taariikhaha biloowga iyo dhammaadka mudada mushaarka, tirada saacadaha iyo badka qorshaha adeegga ee la ogolaaday, iyo macmiilka iyo adeeg bixiyaha.
- **Xeerka Ganacsiga:** Xeerka Ganacsigu wuxuu u sheegayaa nidaamka haddii aad samaynayso ama aadan samaynayn wax. Ku fashilmida qaar kamid ah xeerarka ganacsiga ayaa keeni karta inaan waqtiga la gasho la kaydin. Ku fashilmida xeerarka kale ee ganacsiga ayaa ogolaan kara in la kaydiyo waqtiga la gashay laakiin ku jiraaya xaalad Sugaya ah.
- **Macmiilka:** Galka macmiilka ee OR PTC DCI waxaa la yiraahdaa Galka Macmiilka.
- **Shaqaalaha:** Galka adeeg bixiyaha ee OR PTC DCI waxaa la yiraahdaa Galka Shaqaalaha. Tani waxaa ku jira Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Shaqaalaha Daryeelka Gaarka ah.

- **Masuulka:** Haddii macmiilku uu leeyahay Consumer Employer Representative (CER, Wakiilka Shirkada uu U shaqeeyo Macmiilku), wuxuu adeegsanayaa galka ku jira OR PTC DCI oo loo yaqaano Galka Masuulka.
- **Diiwaanka Taariikhda:** Diiwaanka Taariikhda waa diiwaan la galsho Barta Webseedka OR PTC DCI oo aan la gelin waqtigii ay dhacday. Diiwaannada taariikhda ayaan waafaqsanayn Electronic Visit Verification (EVV, Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah). Haddii adiga, adeeg bixiyaha, aad ku nooshihiin aaga waqtiga oo ka duwan meesha aad ka shaqeyso, xaqiiji inaad geliso diiwaannada taariikhda si waafaqsan aagaaga waqtiga.
- **Xafiiska Maxaliga:** Xafiiska Maxaliga waa xafiiska Oregon Department of Human Services (ODHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon) ee aagaaga. Haddii aad tahay Macmiilka Daryeelka Gaarka ah (PCA), waa inaad la xiriirtaa barnaamijka PCA badelka taas.
- **OR PTC DCI Fob:** Waxaad adeegsan kartaa aalad yar, oo la yiraahdo fob, si aad u geliso diiwaannada waqtiga ay dhacayaan. Tan ayaa u baahan inaad doorato batoonka aalada fob biloowga iyo dhammaadka tookadaada shaqada, aad diiwaan geliso koodhka soo baxaaya, aadna geliso koodhka iyo xogta kale ee tookada shaqada Barta Webseedka OR PTC DCI hadhoow.
- **Abka Moobilka OR PTC DCI:** Waxaad u adeegsan kartaa abka moobilka si aad u geliso biloowga iyo dhammaadka wakhtiga shaqada. Macmiilka ayaa dooran kara inuu saxiixo adeegyada aad bixisay asagoo adeegsanaaya abka moobilka.
- **Webseedka Buuxa ee Abka Moobilka OR PTC DCI:** Webseedka buuxa ee OR PTC DCI ayaa sidoo kale laga geli karaa aaladaha moobilka. Ka gal webseedka OR PTC DCI aaladaada moobilka. Kadibna dooro Gal Bogga Buuxa oo ka hoosaysa batoonka Gal. Barta buuxda waxay kuu sahlaysaa inaad wax ka badesho diiwaannada, aad geliso taariikhaha iyo diiwaannada fob, aad geliso badka, akhrido, aadna dirto fariimaha, aadna samayso wax kale oo lagu samayn karo Barta Webseedka OR PTC DCI.
- **Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI:** Webseedka moobilka waa aalad moobilka lagu isticmaali karo Barta Webseedka OR PTC DCI. Aaladaada casriga ah ayaa diiwaan gelinaysa webseedka moobilka marka webseedka OR PTC DCI aad ka gasho baroowsar. Ma awoodid inaad wax ka badesho diiwaannada la gasho Webseedka Moobilka OR PTC DCI, kumana arki karid xogta bogga hore, sida cabirka waqtiga dheeriga ah.
- **Laylaynka OR PTC DCI:** Waxaad u adeegsan kartaa taleefanka laylaynka ee macmiilka si aad u geliso biloowga iyo dhammaadka wakhtiga shaqada, am aad u geliso diiwaannada taariikhda.
- **Barta Webseedka OR PTC DCI:** Webseedka buuxa ee OR PTC DCI, ama barta webseedka, waxaa laga geli karaa shaashada ama laabtoobka, iyo sidoo kale aalada casriga ah (marka laga galo aalada casriga ah, waxay kaydinarsaa Webseedka Moobilka OR PTC DCI).





- **Baasweerka:** Baasweerka ay ku siisay Wakaaladu si aad ugu gasho OR PTC DCI. Waxaa lagaa doonayaa inaad cusbooneysiiso baasweerkaaga marka koobaad ee aad gasho aadna badesho 60 maalmoodba mar intaas kadib si aad u ilaaliso amaanka.
- **BIINKA:** BIINKU waa lambar afar god ah oo aad u adeegsan karto inaad ku gasho Abka Moobilka OR PTC DCI badelka baasweerkaaga. Waxaad sidoo kale gelinaysaa marka aad bilaabayso iyo marka aad dhamayso shaqada adoo adeegsanaaya Laylaynka OR PTC DCI. Macaamiisha waxaa sidoo kale la siiyaa BIIN ay qasab tahay inay gashaan haddii ay abuuraan diiwaan taariikheed ay gashaan Laylaynka OR PTC DCI. Haddii ay doonayaan, waxay u adeegsan karaan ku diiwaan gelinta waqtiga rasmiga ah Abka Moobilka OR PTC DCI OR PTC DCI.
- **Xirmada:** Diiwaanka waqtiga ama diiwaanka badka.
- **Diiwaannada Waqtiga Markaas:** Diiwaannada Waqtiga Markaas waxaa la sameeyaa marka aad adiga, oo ah adeeg bixiyaha, aad bilowdo iyo marka aad dhamayso waqtiga tookadaada shaqada. Diiwaannada waqtiga markaas ee OR PTC DCI waxay waafaqsan yihiin Electronic Visit Verification (EVV, Xaqijinta Booqashada Elektarooniga ah).
- **Koodhka Sababta:** Koodhka Sababtu waa sababta aadan xogta u diiwaan gelin markii ay dhacday. OR PTC DCI ayaa u baahan koodhka sababta marka lagu daraayo diiwaanka taariikhiga ah ee barta webseedka ama marka aad wax ka badesho diiwaanka. Koodhadhka sababtu waxay muhiim u yihiin Wakaalada si ay u awoodo inay la socoto ku dhaqanka EVV. Adeeg bixiyaashu waa inay keliya doortaan koodhadhka ku bilowda Adeeg bixiyaha oo ku jira liiska dookhyada soo baxaaya marka ay dooranayaan koodhka sababta.
- **Ciwaanka Adeegga:** Ciwaanka adeeggu wuxuu ku xirayaa adeeg bixiyaha iyo macmiilka OR PTC DCI. Ciwaanka adeegu wuxuu u fasaxayaa adeeg bixiyaha inuu aburo diiwaannada saacada iyo diiwaannada badqaka ee macmiilka.
- **Koodhka Adeegga:** Magaca adeegga aad siiso macmiilkaaga. Waxaa lagu soo bixin doonaa si aad u doorato koodhka adeegga inta aad waqtiga diiwaan gelinayso. Tusaalaha magaca koodhka adeeggu waa Saacadle ADL/IADL-1.
- **Aalad Casri ah:** Aalad elektaroonig ah oo ku shaqeysay midkood Android 8.0 (ama ka sareysa) ama iOS 13 (ama ka sareysa). Tusaaleyaasha waxaa ku jira taleefannada iyo taableedyada casriga ah.
- **Ciwaanka isticmaalaha:** Magaca ay ku siisay Wakaaladu si aad ugu gasho OR PTC DCI. Kan waxaa laga badeli karaa qaybta Habeynada (arag [Baddel Ciwaanka isticmaalaha](#) si aad u aragto xog dheeri ah).

Gelitaanka Barta Webseedka OR PTC DCI

Xogta Ciwaanka isticmaalaha iyo Lambarka sirta


Waa maxay ciwaankayga isticmaalaha?

Ciwaankaaga isticmaaluhu waa aqoonsigaaga gaarka ah marka aad isticmaalayso OR PTC DCI. Waa qasab inaad gelisaa ciwaankaaga isticmaalaha markasta oo aad galayso OR PTC DCI. Waad badeli kartaa magaca isticmaalaha marka aad gasho adoo tagaaya qaybta Habeynada (arag [Badel Ciwaanka isticmaalaha](#) si aad u hesho xog dheeri ah).

Ciwaankaaga isticmaalaha waxaa ku siisay Wakaalada. Caadiyan, ciwaankaaga isticmaaluhu waa qaabka soo socda: magacakoobaad.magacasadexaad

Tusaale, haddii magacaagu yahay John Smith, ciwaankaaga isticmaaluhu waa John.Smith.

Haddii aad u baahan tahay inaad xaqiijiso ciwaankaaga isticmaalaha, la xiriir Xafiiska Maxaliga. Isticmaaleyaasha leh magacyada dadka ku badan, ciwaankaaga isticmaalaha ayaa lambar lagu dari karaa dhammaadkiisa.



The screenshot shows a login form for DCI (Direct Care Innovations). At the top center is the DCI logo with the text 'DIRECT CARE INNOVATIONS' below it. Below the logo, the word 'Gal' is centered. There are two input fields: the first is labeled 'Magacaisticmaalaha' and the second is labeled 'Lambarka sirta ah'. Below the second field, there is a checkbox labeled 'Ixsuuso' and the text 'Ma ilowday lambarka sirta ah'. At the bottom center is a blue button labeled 'Gal'.

Waa maxay Lambarkayga sirta?

Waxaad u baahan tahay baasweer si aad u gasho OR PTC DCI. Waxaa Baasweerkaaga ku meel gaarka ah ku siisay Wakaalada. Haddii aad u baahan tahay inaad xaqiijiso baasweerkaaga ku meel gaarka ah, la xiriir Xafiiskaaga Maxaliga. Marka aad ku gasho baasweerkaaga ku meel gaarka ah, waxaa lagaa codsan doonaa inaad baddesho. Kadib marka aad badesho baasweerkaaga, waxaad adeegsan kartaa ikhtiyaarka [ilow Lambarka sirta ah](#) haddii aad iloowdo baasweekaaga.

Xeerarka Lambarka sirta


- Waa qasab inuu ka kooban yahay 10 xaraf.
- Waa inay ku jiraan 1 xaraf oo wayn, 1 xaraf oo yar, 1 lambar, iyo 1 xaraf oo gaar ah (tusaaleyaasha xarafaha gaarka ah waxaa kamid ah calaamadaha shaqalka ama astaamaha kale).
- Ma lahaan karo wax ka badan 2 xaraf oo soo noqnoqda oo xiriira.
- Ma lahaan karo wax ka badan 2 xaraf oo soo noqnoqda oo ku jira ciwaanka isticmaalaha.
- OR PTC DCI ayaa u baahan inaad baddesho baasweerkaaga 60 maalinba mar sababo amaan awgood.
- Ma isticmaali kartid wax kamid ah 24 baasweer ee aad horey u isticmaashay.

Fiiro gaar ah: Tusaalaha baasweerku wuxuu u egyahay: ILovePTC2021!

Gelitaanka

Si aad u gasho Barta Webseedka OR PTC DCI

1. Baroowsarka webseedka shaashadaada ama kumbuyuutarka laabtoobka, booqo orptc.dcisoftware.com.
2. Geli ciwaankaaga isticmaalaha.
3. Geli baasweerkaaga.
4. Dooro Gal.



Fiiro gaar ah: Waxaad sidoo kale ka geli kartaa barta webseedka baroowsarka webseedka ee aalad casri ah.



Fiiro gaar ah: Ma ilowday baasweerkaaga? Arag [Baddel Lambarka sirta](#) si aad u hesho xog dheeri ah.



Gelitaanka Marka Koobaad

Marka aad gasho marka koobaad, waxaa lagaa codsan doonaa inaad badesho baasweerkaaga.

1. Dul istaag calaamada “i” ee wareegsan ee dhanka midig si aad u aragto shuruudaha lambarka sirta.
2. Geli lambarkaaga sirta cusub labada godba.
3. Dooro Beddel Lambarka sirta ah.

Kadib marka aad badesho lambarkaaga sirta, iimeel ayaa lagaaga soo diri doonaa orptcsupport@dcisoftware.com kaasoo sheegaaya in aad badeshay baasweerkaaga.

Shuruudaha Lambarka sirta ah-

1. Waa inuu ahaado ugu yaraan 10 xaraf
2. Waa inuu ka koobnaadaa 1 xaraf oo waaweyn, xarfo yaryar, lambarro iyo calaamado gaar ah
3. Waa inuusan ku jirin in ka badan laba xaraf oo isku mid ah
4. Lambarka sirta ahi waa inuu ka duwanaadaa lambaradii sirta 24 hore.



Su'aasha Ammaanka

Si aad u sugto amaanka bogaaga, waxaad u baahan doontaa inaad doorato su'aasha ammaanka.

1. Dooro liiska hoos u soo baxaaya.
2. Dooro hal su'aal oo aad xasuusan doonto jawaabteeda.

Fiiro gaar ah: Waa inaad xasuusnaataa jawaabta su'aasha ammaanka ee aad doorato si aad u badesho baasweerkaaga mustaqbalka.

Borofaylkaada

Su'aal: * Fadlan dooro Su'aasha Amniga

Jawaab:

- Fadlan dooro Su'aasha Amniga
- Waa maxay magaca dhexe ee ilmahaaga ugu da'da weyn?
- Waa maxay magaca dhexe ee walaalkaa?
- Magaaladee ama magaalo nooc ee ah ayey ku kulmeen hooyadaa iyo aabbahaa?
- Magaaladee ama magaalo nooc ee ah ayey ku kulmeen hooyadaa iyo aabbahaa?
- Sheeg magaca meesha lagu qabtay xafadaada soo dhoweynta arooska?
- Waa maxay magaca kuliyaad aad codsatay laakiin aadan dhigan?
- Xagee joogtay markii ugu horeysay ee aad maqasho 9/11?
- Su'aal Gaar ah

Waxaad keliya u baahan doontaa inaad xulato su'aashaada ammaanka marka koobaad ee aad gasho.

Shuruudaha Su'aasha Ammaanka

- Jawaabta su'aasha ammaanku waa inay noqotaa ugu yaaan 5 xaraf.
- Ciwaanka isticmaalaha ama baasweerka looma adeegsan karo jawaabta su'aasha amaanka.
- Haddii jawaabtu ku jirto liiska baasweerada badanaa la isticmaalo, waxaad arki doontaa fariintaan:
 - Jawaabta aad gelisay waxaa lagu arkay liiska baasweerka badanaa la isticmaalo si fudud ayaana qofku u qiyaasi karaa. Iskuday inaad adeegsato eray ama weedh kale.
 - Haddii aad dooneyso inaad ku sii socoto isticmaalka erayga ama weedha aad gelisay, tigsaar godka Isticmaal Jawaabtaan si Kastaba.
 - Haddii aad dooneyso inaad geliso eray ama weedh kale, keliya wax ka badel godka Jawaab adoo gelinaaya jawaabtaada cusub.

Tusaalaha jawaab aan buuxin shuruudaha waa Ohio waayo kama koobna 5 xaraf.

Boostiyada Wararka

Kadib marka aad gasho, waxaad arkaysaa Ogeysiiska Xaqiijinta Adeeg Bixiyaha iyo Isticmaalka Nidaamka. Xaqiijinta Adeeg bixiyuhu waxay sheegaysaa in adiga, oo ah adeeg bixiye, aad gelin doonto waqtiga bilowga iyo dhammaadka ee saxda ah aadna keliya qabanayso shaqooyinka ku qoran liiskaaga la ogolaaday. Marka aad gujiso Waayahay gudaha Xaqiijinta Adeeg bixiyaha, waxaad qiraysaa in ka been abuurista xogtaan ay ka dhigan tahay khiyaano aad ka gashay Medicaid. Marka aad gelinayso waqtiga dhammaadka ama aad abuuraysa diiwaanka wakhtiga, waxaad qiraysaa Xaqiijinta Adeeg bixiyaha markale adoo tigsaraaya odka ama riixaaya 1 oo ka dhigan haa marka aad isticmaalayso layn-laynka.

Ogeysiiska Isticmaalka Nidaamka ee soo baxaaya marka aad gasho ayaa sheegaaya in OR PTC DCI la muraaqabeynaayo lana diiwaan gelinaayo. Ujeedada nidaamku waa in lala socdo saacadaha ay shaqeeyeen adeeg bixiyaasha loo ogol yahay iyo in la xaqiijiyo in tilmaamaha EVV ee gobalka iyo federaalka lagu dhaqmo. OR PTC DCI waxaa ku jira xog shaqsi ah oo qarsoodi ah. Marna xogtaada gelitaanka hala wadaagin cid kale. Marka aad adeegsato nidaamka, waxaad aqbalaysaa shuruudaha kore.

Fadlan si taxadar leh u akhri Ogeysiiska Xaqiijinta Adeeg Bixiyaha iyo Isticmaalka Nidaamka. Waxaa laga yaabaa inaad aragto Boostiyada Wararka kale oo ku siinaaya tilmaamo, xog ku saabsan isbadellada nidaamka, ama xog kale oo Gobalku doonaayo inaad ogaato.

Akhri kadibna dooro Waayahay si aad u xaqiijiso una aqbasho xogta ku qoran Boosti Kasta oo Wareed.



Qoraalada Wararka

Mawduuca - Cadeeynta Bixiyaha

Fariin:

Bygujinaya "OK", Waxaan xaqiijinayaa in jeer bilowga iyo dhamaadka sheegay si sax ah ka dhigan jeer in aan bixiyo adeegyada/taageero macaamilka-loo shaqeeyaha, Waxaan sameeyaa oo kaliya hawlaha kuwaas oo sida ku cad liiska hawsha macaamilka-shaqeeyaha ee, oo waxaan raacayaa xeerarka si waafaqsan barnaamijka aan ku qoran ahay. Waxaan qirayaa in been macluumaadkan waxaa loo tixgelin karaa musuqmaasuq Medicaid. Waxaan fahamsanahay in markii aan saacad baxay, Waxaan hubin doonaa sanduuq cadeynaya in aan waqti sax yahay iyo macluumaad been ah waxaa loo tixgelin karaa musuqmaasuq Medicaid.

Taariikhda la Sameeyay: Aug 08, 2022 07:41:23 AM

Waxaa Sameeyay:

Waayahay



Qoraalada Wararka

Mawduuca - Nidaamka Isticmaalka Ogeysiiska

Fariin:

Isticmaaluhu wuxuu helayaa nidaam xaddidan. Isticmaalka nidaamka waxaa laga yaabaa in lala socdo, duubo, oo ku xiran xisaabinta. Isticmaalka aan la ogolayn ee nidaamka waa mamnuuc waxaana laga yaabaa inay ku xiran tahay ciqaabta dembiyada, madaniga ah, ama xukunka maamulka. Isticmaalka nidaamka ka dhigan ogolaansho in la socodka iyo wax lagu qoro. Ujeedada goobta waa in la oggolaado ka qaybgalayaasha oggolaanshaha ee Madaxbanaanida Mashruuca Oregon, Qorshaha Gobolka ee Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee qaybta Nidaamka Caafimaadka ee OHA iyo Qaybta Dadka Naafada ah ee ODHS iyo Dadka Naafada ah, iyo Barnaamijka Bixiyaha Shaqaaleysiinta ee Guriga si ay ula socdaan bixinta adeegyada la oggol yahay .

Waxaa

laguu oggol yahay oo keliya inaad isticmaasho boggan, ama macluumaad kasta oo laga helo boggan, ujeedadeeda loogu talagalay. Helitaanka aan la ogoleyn ama wadaagista aan la ogoleyn ee macluumaadka shakhsiyeed iyo qarsoodi ah waxaa lagu ciqaabi karaa ganaax waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka. Helitaanka aan la ogolayn ama qaybsiga aan la ogolayn sidoo kale waxaa laga yaabaa in dambi ciqaab. Gobolka Oregon socota sharciga iyo xeerarka federaalka iyo gobolka si ay u ilaaliyaan macluumaadka ka si xun ama helitaanka aan la ogolayn.

Taariikhda la Sameeyay: Jul 21, 2022 07:34:17 AM

Waxaa Sameeyay:

Waayahay


Luuqada aad Door-bideyso

Si aad u baddesho luuqada aad door-bideyso:

1. Doorro batoonka luuqada oo ka muuqda geeska midig ee kore.
2. Doorro luuqada aad doorbideyso.

Shaashadaada ayaa hadda muujin doonta luuqada cusub markasta oo aad gasho OR PTC DCI.

Dookhyada luuqadaha la heli karo waxaa kamid ah Ingiriiska, Isbaanishka, Af-Ruushka, Jayniiska Fudud, Fiyeednaamiiska, Carabiga, iyo af-Soomaaliga.



Dookhyada Diiwaan gelinta Wakhtiga.

Diiwaannada wakhtiga ayaa waafaqsan EVV haddii adiga, oo ah adeeg bixiyaha, aad adeegsato mid kamid ah qaababka soo socda ee diiwaanka wakhtiga si aad u qorto waqtiga bilowga iyo wakhtiga bixitaanka isla markaba:

- Abka Moobilka OR PTC DCI
- Laylaynka OR PTC DCI
- OR PTC DCI Fob




Abka Moobilka OR PTC DCI

Abka Moobilka OR PTC DCI waa ablikeeshin lacag la'aan ah oo:

- Kuu sahlaaya adiga, oo ah adeeg bixiyaha, inaad si fudud u geliso bilowga iyo dhammaadka waqtiga isla markaba.
- Keliya wuxuu ka kooban yahay 16 megabytes, marka kama qaadanaayo boos wayn aaladaada casriga ah.

Si aad u isticmaasho Abka Moobilka OR PTC DCI, waa inaad:

- Haysataa aalad casri ah (Android ama Apple).
- Aad haysataa aalad casri ah oo ku shaqeysa nidaamka shaqada ee Android 8.0 ama Apple iOS 13 ka cusub. Haddii kale, aalada ayaan ku shaqeyn doonin.
- Waa inaad heli kartaa khadka Wi-Fi-ga ama aad adeegsan karto interneedka simikaarka.



Fiiro gaar ah: Xogta nidaamka shaqada ayaa laga heli karaa settings-ka nidaamka aaladaada.

Soo degsashada Abka Moobilka OR PTC DCI


Si aad u soo degsato Abka, ka gal bogaga Apple App Store ama Google Play Store aaladaada.

Aaladda Apple



tusaale: iPhone ama iPad

Aaladda Android




tusaale: taleefan casri ah ama taableed



1. Ku qor “OR PTC DCI” godka baarista.
2. Ka dooro OR PTC DCI liiska ablikeeshinnada la heli karo.

Fiiro gaar ah: Waxaa jira wax ka badan hal abka moobilka DCI, xaqiiji inaad doorato kan magaciisu yahay **OR PTC DCI**.



3. Dooro Install (Soo degso) kadibna fur abka marka soo dejintu dhammaato.






Gelitaanka Abka Moobilka OR PTC DCI

1. Fur Abka Moobilka OR PTC DCI ee ku jira taleefankaaga.
2. Geli ciwaankaaga Istickmaalaha iyo Baasweerka ama BIIN.
3. Taabo calaamada isha u eg si aad u soo bixiso ama u qariso baasweerka aad gelisay.
4. Tigsaar Ixusuuso haddii aad dooneyso in nidaamku uu xasuusto ciwaankaaga isticmaalaha, talaabadaan ma xasuusan doonto baasweerkaaga.
5. Guji Gal.




Fiiro gaar ah: Dooro batoonka luuqada oo ku yaala geeska kore ee midig si aad u baddesho luuqada shaashadaada gelitaanka!



Gelitaanka markaagii koobaad ayaa kaa dooneysa inaad abka u fasaxdo inuu ogaado goobta aaladaada.

Fiiro gaar ah: Waa qasab inaad doorato Allow While Using App (Ogoloow Inta aad Isticmaalayso Abka) ama abku kuuma ogolaan doono inaad waqtiga geliso.

Goobta waxaa keliya la diiwaan gashaa xiliga bilowga iyo xiliga dhammaadka shaqada.



Boostiyada Wararka Abka Moobilka

- Kadib markasta oo aad gasho, waxaad arkaysaa marka koobaad Ogeysiiska Xaqiijinta Adeeg Bixiyaha iyo Isticmaalka Nidaamka. Mararka qaar waxaad sidoo kale arki kartaa shaashada boostiga cusub oo kuu sheegaaya wargelinno muhiim ah. Arag [Boostiyada Wararka](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.
- Akhri fariin kasta kadibna guji Waayahay si aad u sii wado.



Mawduuca: Nidaamka Isticmaalka
Ogeysiiska

Fariin:

Isticmaaluhu wuxuu helayaa nidaam xaddidan. Isticmaalka nidaamka waxaa laga yaabaa in lala socdo, duubo, oo ku xiran xisaabinta. Isticmaalka aan la ogolayn ee nidaamka waa mamnuuc waxaana laga yaabaa inay ku xiran tahay ciqaabta dembiyada, madaniga ah, ama xukunka maamulka. Isticmaalka nidaamka ka dhigan ogolaansho in la socodka iyo wax la'uu qoro. Ujeedada aqoobta waa in la Taariikhda la Sameeyay: Lul 21, 2022
07:34:17 GH

Waayahay



Mawduuca: Cadeeynta Bixiyaha

Fariin:

Bygujinaya "OK", Waxaan xaqiijinayaa in jeer bilowga iyo dhamaadka sheegay si sax ah ka dhigan jeer in aan bixiyo adeegyada/taageero macaamilka-loo shaqeeyaha, Waxaan sameeyaa oo kaliya hawlaha kuwaas oo sida ku cad liiska hawsha macaamilka-shaqeeyaha ee, oo waxaan raacayaa xeerarka si waafaqsan barnaamijka aan ku qoran ahay. Waxaan qirayaa in been macluumaadkan waxaa loo tixaeelin karaa musuumaasua
Taariikhda la Sameeyay: Ogs 8, 2022
07:41:23 GH

Waayahay




Bogga hore ee Abka Moobilka

Hadda oo aad si guul leh u soo degsatay aadna u gashay abka moobilka, aan akhrino bogaaga hore:

1. Waxaad arki kartaa fariimahaaga adoo dooranaaya boqshada ka muuqata geeska midig ee kore.
2. Qiyaasta Wakhtigaaga ayaa muujinaaya tirada saacadaha aad shaqaysay ilaa hadda intii lagu jiray asbuuca mushaarka. Tani ma muujinayso tirada saacadaha lagu ogol yahay inaad shaqeyso.
3. Shaashada Wadaarta Saacadahaaga ayaa muujinaysa saacadaha aad shaqaysay asbuucaas ayadoo ku saleysan xaalada (La ogolaaday, Rajman, iyo Aan La Xaqiijinta).

Fiiro gaar ah: Haddii aadan shaqeyn saacado kasta oo ku jira mudada mushaarka, tan ayaa muujinaysa 0 saacadood.


4. Hoos u dago si aad u aragto fariimo muhiim ah oo ka yimid Wakaalada lana yiraahdo Boostiyada Wararka.
5. Dooro Boostiga Wararka si aad u aragto fariinta oo dhan.



Dookhyada Abka Moobilka

Hadda aan akhrino dookhyada abka moobilka:

1. Dooro calaamada 3 layn ee jiifka ah si aad u aragto dookhyadaada.
2. Guri - waxay kugu celinaysaa bogga hore.
3. Fariin - waxay ku geynaysaa Qaybta Fariimaha ee OR PTC DCI.
4. Gelitaanka - liiska dhammaan diiwaannada waqtigaaga.
5. Raadi - wax ka baarista abka.
6. Luqadda - baddel luuqada aad dooneyso.
7. Ka bax - waxay kaa saaraysaa abka waxayna ku gaynaysaa shaashada gelitaanka.





Qaybta Fariimaha Abka Moobilka

Waa inaad keliya u adeegsataa Qaybta Fariimaha ee OR PTC DCI si aad ula xiriirto shaqsiyaadka aad taqaano, sida maareeyaha kiiska ee macmiilkaaga. Qaybtaan looma adeegsan karo xiriirada xaaladaha degdega ah.

Si aad u aragto fariin: Dookhyada, ka dooro Sanduuqa. Waxaad arkaysaa liiska fariimaha. Dooro midka aad dooneyso inaad akhrido.

Si aad u dirto fariin:

1. Dookhyada, ka dooro Fariin.
2. Dooro Fariin Cusub.
3. Dooro godka Ku socota kadibna biloow inaad qorto magaca qof aad dooneyso inaad fariin u dirto; dooro magaca marka uu soo baxo.
4. Geli Mawduuca fariinta.
5. Dooro Mudnaanta.
6. Dooro Fariintaada.
7. Ku dar Lifaaq haddii aad u baato.
8. Dooro Dir.







Diiwaannada Abka Moobilka

Marka xogta, aan akhrino Diiwaanadaada.

Dookhyada:

1. Dooro Gelitaanka.
2. Dooro gelitaan si aad u aragto faahfaahinta.



Batoonka Gelitaanka, waxaad ka helayaa gelitaannada ku jira xaaladaha kaladuwan:

- **Aan la Xaqiijin:** Gelitannada shaqaalaha Xafiiska Maxaliga uu gashay asagoo wakiil ka ah adeeg bixiyaha. Waa muhiim in la xaliyo gelitaannada aan la xaqiijin, haddii kale mushaarkooda lama bixin doono. Arag [Gelitaannada aan La Xaqiijin](#).
- **La Sugaya:** Dhammaan gelitaannada ayaa Sugi doona kadib marka koobaad ee la gasho. Gelitaan ku jira xaalada sugitaanka waxaa wax ka badeli karaa adeeg bixiye.
- **La Diiday:** Gelitaanka uu diiday macmiilka, Xafiiskaaga Maxaliga ah, ama hanaanka nidaamku. Gelitaannadaan waxba kama badeli karo adeeg bixiyuhu. Waa farsamo wanaagsan inaad akhrido gelitaannada ku jira xaalada diidmada ah. Lacag kuma haysid gelitaannada ku jira xaalada diidmada.



- **La Ogolaaday:** Gelitaannada ay ogolaatay Wakaaladu una diyaarsan in lacagtooda la baxsho. Gelitaannadaan waxba kama badeli karo adeeg bixiyuhu. La xiriir Xafiiska Maxaliga si wax looga badelo gelitaannadaan, haddii loo baahdo.
- **Laga Shaqeeyay:** Gelitaannada laga shaqeeyay una diyaarsan mushaarka ama horeyba loo baxshay mushaarkooda. Gelitaannadaan waxba kama badeli karo adeeg bixiyuhu. La xiriir Xafiiska Maxaliga si wax looga badelo gelitaannadaan, haddii loo baahdo.
- **La Baajiyay:** Gelitaannada midkood ay si toos ah u joojiyeen shaqaale kadib markii horey loo ogolaaday ama gelitaan dhaafay saacada saqda dhexe. Marka la ogolaado, gelitaannada dhaafa saxda dhexe ayuu burinayaa nidaamku kadibna labo gelitaan ayaa la abuurayaa (mid loo qoraayo biloowga ilaa 11:59 pm, iyo mid ka biloowda 12:00 ilaa dhammaadka).
- **Furan:** Gelitaan socda (saacada biloowga ayaa la gashay laakiin lama xirin dhammaadka).

Godka Gelitaanka, waxaad:

- Xaqiijin kartaa gelitaannada ku jira xaalada Aan la Xaqiijin.
- Diidi kartaa geitaannada ku jira xaalada Sugaya ee lagu sameeyay qaab khalad ah.

Si aad wax uga badesho xaalada Rahm\ ee khaladaadku ku jiraan, waa inaad adeegsataa Barta Webseedka OR PTC DCI ama Barta Buuxda ee Webka Moobilka OR PTC DCI.

Gelitaannada ku jira xaalada La Ogolaaday ama Laga Shaqeeyay ee u baahan in wax laga badelo, fadlan la xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan.

Gelitaannada ku jira xaalada Diidmada, waa inaad abuurtaa gelitaanka taariikhda cusub si aad u saxdo khaladka keenay diidmada.


Gelitaannada ku jira xaalada Furan, waa inaad ka baxdaa waqtiga shaqada kadibna wax ka badeshaa gelitaanka ama la xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan.

Abka Moobilka: Xaqiiji gelitaanka

Waxaad helaysaa fariin looso dirayo iimaylkaaga iyo sanduuqaaga Qaybta Fariimaha ee OR PTC DCI haddii aad heshay gelitaan u baahan in la xaqiijiyo.

Si aad u xaqiijiso gelitaanka, dooro gelitaanka, kadibna:

1. Dooro FICIL.
2. Dooro Xaqiiji.
3. Dooro Xaqiiji.






Abka Moobilka: Diid Gelitaanka

Haddii waqtiga la galshay ayadoo wakiil lagaa yahay uusan sax ahayn, waad diidi doontaa gelitaankaas.

Si aad u diido gelitaanka, dooro gelitaanka, kadibna:

1. Dooro FICIL.
2. Dooro Diid.
3. Dooro Xaqiiji.
4. Dooro Xaqiiji.



Luuqada aad Door-bideyso ee Abka Moobilka


Si aad u baddesho luuqada aad door-bideyso:

1. Dooro calaamada leh sadexda layn ee jiifka ah si aad u aragto dookhyadaada.
2. Dooro Luqadda.
3. Dooro luuqada aad doorbideyso.
4. Dooro Waayahay.

Shaashadaada ayaa hadda muujin doonta luuqada cusub markasta oo aad gasho OR PTC DCI.

Dookhyada luuqada ee la heli karo waxaa kamid ah:

Ingiriiska, Isbaanishka, Af-Ruushka, Jayniiska Fudud, Fiyeednaamiiska, Carabiga, iyo af-Soomaaliga.






Ka bixida Abka Moobilka

Si aad uga baxdo:

1. Dooro calaamada 3 layn ee jiiifka ah si aad u aragto dookhyadaada.
2. Dooro Ka bax.
3. Waxaa lagu celin doonaa shaashada Gelitaanka.






Gelitaannada Waqtigooda la sameeyo OR PTC DCI

Hadda oo aan ognahay sida loosoo degsado loona galo Abka Moobilka OR PTC DCI, aan eegno sida aan u samayn karno gelitaannada waqtigooda dhaca. Raac talaabooyinka marka aad gasho Abka Moobilka OR PTC DCI si aad U geliso Saacada Gelitaanka:


1. Dooro Gelli Saacada-Gellitaanka.
2. Dooro falaarta tilmaamaysa Macaamiil si aad u soo bixiso dookhyada.
3. Ka dooro magaca macmiilkadookhyada hoose.



Fiiro gaar ah: Haddii aad u adeegto macaamiil badan, waxaad u baahan kartaa inaad hoos ugu degato liiskan.



4. Dooro falaarta tilmaamaysa Koodhka Adeegga si aad u soo bixiso dookhyada.
5. Dooro Koodhka Adeegga saxda ah kadibna dooro Waayahay (haddii aadan horey u dooran).
6. Dooro Sii Wad.
7. Dooro Xaqiiji saacadda gudaha.





Marka tookadaada shaqadu dhamaato, keliya ku laabo Abka Moobilka OR PTC DCI kadibna raac talaabooyinka si aad u geliso saacada bixitaanka.

1. Dooro Sii wad inaad ka baxdid.
2. Dooro Xaqiiji.


Kadib marka aad xaqiijiso, waxaa lagu gayn doonaa Xaqiijinta Saacada Ka Bixida. Saacada Ka Bixitaanku ma dhamaystirna ilaa aad ka buuxiso Xaqiijinta Saacada ka Bixida aadna dhameystirto xaqiijinta.

Xaqiijinta Saacada Ka Bixida ee Abka Moobilka

Marka aad ka baxdo shaqada, waxaad haysataa sadex dookhyada saxiixa macmiilka ah oo aad kala dooran karto. Kuwaan sidoo kale waxaa loo yaqaanaa dookhyada xaqiijinta marka la joogo Abka Moobilka OR PTC DCI.

1. BIIN/Lambarka sirta ah
2. Saxiix
3. Saxiixa Barta oonlaynka ah

Aan akhrino kuwaan midba mar.




Fiiro gaar ah: Macmiilkaaga ayaan laga doonayn inuu saxiixo tookadaada, dookha adiga ayaa iska leh haddii aad dooneyso inuu saxiixo. Haddii macmiilku go'aansado inuusan saxiixin waqtiga gelitaanka, keliya dooro dookha 3.



Ka bixida Abka Moobilka: BIIN/Lambarka sirta

1. Dooro BIIN ama Lambraka sirta kadibna aalada u dhiib macmiilka.
2. Macmiilka ayaa gelinaaya BIIN ama Lambarka sita.
3. Dooro Gudbi.
4. Dooro Xaqiiji.

Fiiro gaar ah: Haddii BIIN ama Baasweer si khalad ah loo gasho sadex jeer, waxaad helaysaa fariin kuu sheegaysa inaad dhaaftay xadkii loo cayimay iskudayada ugu badan. Gadaal ayay kuu celinaysaa oo waa inaad isticmaasho qaab kale oo xaqiijin.






Clock Out (Ka bixida) Abka Moobilka: Saxeex Elektoroonig ah

1. Dooro Saxeex Elektorooniga ah kadibna aalada u dhiib macmiilka.
2. Macmiilka ayaa magaciisa ku saxiixaaya shaashada.
3. Dooro Keydso.
4. Dooro Xaqiiji.

Fiiro gaar ah: Haddii macmiilku uusan jeclaysan saxeexiisa, wuxuu dooran karaa Tirtir oo markale iskuday.






Ka bixida Abka Moobilka: Saxiixa Barta oonlaynka ah
Haddii macmiilku uusan awoodin inuu saxiixo gelitaanka ama uusan doonayn inuu saxiixo gelitaanka ama haddii macmiilku uu leeyahay wakiilka loo shaqeeyaha macmiilka (CER), diiri Saxiixa Barta oonlaynka ah. Qaadashada dookhaan ayaan saamayn ku lahayn jadwalka mushaarkaaga.

1. Dooro Kabixida Barnaamijka Macaamiisha.
2. Dooro Xaqiiji.

Fiiro gaar ah: Macmiilka/Customer Employment Representative (CER, Wakiilka Shaqada Macmiilka) ayaan laga doonayn inuu qaado wac talaabo dabagal ah oo ku aadan xulashadaan, laakiin adigu waa inaad wali doorataa dookha xaqiijinta.





Saacada Ka Bixida Abka Moobilka

Kadib marka aad buuxiso mid kamid ah sadexda qaab ee xaqiijinta, waad dhamaynaysaa hawsha gelinta saacada ka bixida.

1. Waxaad raacin kartaa Qoraallo iyo Lifaaxyo. Qaybta qoraalku waxay ku shaqeysaa inaad adeegsato kayboorka aaladaada casriga ah (taasoo ka dhigan inaad qori karto fariinta ama aad adeegsato fariin qoraalka wada hadalka haddii aaladaada casriga ah leedahay dookhaan). Qoraallada iyo Lifaaxyadu waa ikhtiyaari mana ahan in loo adeegsado fariimaha xaaldaha degdega ah.
2. Dooro bokiska tigma xaqiijinta si aad u xaqiijiso in waqtigaagu saxan yahay.

Fiiro gaar ah: Si aad saacada ka bixida si sax ah ugu geliso, waa inaad tigma saartaa godka xaqiijinta.

3. Dooro Xaqiiji Ka bixida saacada shaqada si aad u dhameysto hawsha ka bixida. WAA INAAD buuxisaa qaybtaan si aad uga baxdo.
4. Xogta qaybta ayaa soo baxaysa kadib marka aad si guul leh uga baxdo. Haddii aadan arkin dookhaan, wali kama aadan bixin shaqada.
5. Dooro Guri si aad ugu laabato Shaashada Hore.





Su'aalaha iyo Jawaabaha Abka Moobilka OR PTC DCI

Maxay tahay inaan sameeyo haddii aanan uga jeedin batoonka Saacada Gelitaanka shaashadeyda hore?



Haddii aad aragto batoonka Sii Wad Ka Bixida markii la rabay inay dhahdo, "Saacada Biloowga," tan ayaa ka dhigan inaad wali ku jirto diiwaanka tookadii hore ee shaqada. Haddii aadan arkin batoonka Saacada Biloowga ama Saacada Ka bixida, tan ayaa ka dhigan inaad haysan koontada adeegga oo shaqeynaysa. (Si aad u aragto qeexitaanka koontada adeegga, eeg [Weedhaha Guud](#).) Wac Xafiiska Maxaliga ee deegaankaaga si ay kuu caawiyaan ama iimayl u dir PTC.Support@odhsoha.oregon.gov.

Ka waran haddii aanan u jeedin Magaca Saxda ah ee Macmiilka ama Koodhka Adeegga marka aan bilaabaayo shaqada?

Fadlan xaqiiji inaad doorato falaarta ku xigta Macmiilka/Koodhka Adeegga si aad u aragto liiska buuxa. Haddii aysan ku jirin liisnaan, tan ayaa ka dhigan inaad haysan koontada adeegga oo shaqeynaysa ee macmiilka iyo/ama Koodhka Adeegga. Wac Xafiiska Maxaliga ee deegaankaaga si ay kuu caawiyaan ama iimayl u dir PTC.Support@odhsoha.oregon.gov.

Markii aan ka baxaayay, waxaan arkay Digniin sheegaysay xeerka sharciga ganacsiga ee Authorization Remaining Balance (Ogolaanshaha Baaqiga Haray) ayaa la jebiyay, maxay taasi ka dhigan tahay?


Tani ayaa ka dhigan in gelitaankaagu ka batay saacadaha lagu ogol yahay muddo mushaareedka markaas.

Waa inaad doorataa Jooji. Tan ayaa diidaysa gelitaanka, taasoo ku siinaysa digniin labaad oo sheegaysa "Gelitaanka xxxx waa la diiday." Markay halkaan mareyso dookha kaliya waa inaad doorato Xaqiiji. Tani ayaa kugu duweysa bogga hore. Kuma helaysid lacag gelitaan la diiday.

Si aad lacag ugu hesho waqtigaan, waa inaad gelisaa diiwaanka taariikhda si aad u soo sheegto wakhtiga tookadahaas. Xaqiiji in diiwaankaan taariikhda uusan ka baxsanayn saacadaha lagu ogol yahay. Arag [Kudar Gelitaannada Taariikhda hore adoo adeegsanaaya Barta Webseedka](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.

La xiriir Xafiiska Maxaliga haddii aad u baahan tahay caawimaad.


Si aad u hesho jebinnada kale ee xeerka ganacsiga ee imaan kara iyo sharaxaada waxa ay ka dhigan yihiin, eeg [Xaashida Tilmaanta Khaladaadka Badanaa dhaca ee Gelitaannada iyo Jebinnada Xeerka Ganacsiga](#).





Markii aan ka baxaayay, waxaan arkay Digniin sheegaysay "Wadarta qadarta saacada-shaqada kama badnaan karto 16. Waxaad gelisay 21." Maxay taasi ka dhigan tahay?

OR PTC DCI waxay ka hortagaysaa inaad abuurto gelitaanno dhan 16 saacadood ama ka badan. Haddii aad iskudaydo inaad abuurto gelitaan ka dheer 16 saacadood, waxaad arki doontaa ciladaan marka aad ka baxayso. Marka aad aragto ciladaan, waa inaad doorataa Jooji. Kadib marka aad doorato Jooji, digniin labaad ayaa soo baxaysa taasoo sheegaysa, "Aqoonsiga gelitaanka xxxxx ayaa la diiday." Gelitaankaan waa la diiday. Markay halkaan mareyso dookha kaliya waa inaad doorato Xaqiiji. Tani ayaa kugu duweysa bogga hore. Kuma helaysid lacag gelitaan la diiday.




Si aad lacag ugu hesho waqtigaan, waa inaad gelisaa diiwaanka taariikhda si aad u soo sheegto wakhtigaaga, adoo xaqiijinaaya in saacadaha aad gelisay ay ka yar yihiin 16 saacadood. Arag [Kudar Gelitaannada Taariikhda hore adoo adeegsanaaya Barta Webseedka](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Markii aan ka baxaayay, waxaan arkay Digniin sheegaysa xeerka sharciga ganacsiga ee Employee Service Account End date Punch Entry (Gelitaanka Qaybta Taariikhda Dhammaadka Koontada Adeegga Shaqaalaha) ayaa la jebiyay, maxay taasi ka dhigan tahay?

Tani waxaa ku jira taariikhda ku qoran OR PTC DCI oo sheegaysa inaad hadda kadib u shaqeynaynin macmiilkaan. Ma awoodi doontid inaad geliso waqtiga taariikhda kadib taariikhda aad u gelisay maalinta ugu danbeysay ee aad la shaqeyso macmiilkaan.

Waa inaad doorataa Jooji. Tan ayaa diidaysa gelitaanka, taasoo ku siinaysa digniin labaad oo sheegaysa "Gelitaanka xxxx waa la diiday." Markay halkaan mareyso dookha kaliya waa inaad doorato Xaqiiji. Tani ayaa kugu duweysa bogga hore. Kuma helaysid lacag gelitaan la diiday.



Haddii aad u shaqeyso macmiilkaan, la xiriir Xafiiska Maxaliga ah si aad ugu sheegto inaad u shaqeyso macmiilkaan. Ku sheeg inay jirto taariikhda dhammaadka aalada OR PTC DCI. Xafiiska Maxaliga ayaa intaas kadib la xiriiri doona Kooxda Taageerada ee PTC si aad meesha uga saarto taariikhda. Kadib marka hawshaan soo dhamaato, waxaad awoodi doontaa inaad geliso waqtiga macmiilkaan.

Marka dib laguugu xiriiriyo macmiilkaa, si aad lacag ugu hesho waqtigaan, waa inaad gelisaa diiwaanka taariikhda si aad u soo sheegto wakhtiga tookadahaas oo dhan. Arag [Kudar Gelitaannada Taariikhda hore adoo adeegsanaaya Barta Webseedka](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Markii aan geliyay saacada biloowga, waxaan helay fariin sheegaysa inaan koontadaani lahayn ogolaanshaha shaqeynaaya. Maxay tahay inaan sameeyo?

Tan waxay ka dhigan tahay inaad haysan ogolaanshaha (guryaha aad ka shaqeynayso saacadaha ama badadka lagu ogolaaday) macmiil kale iyo Koodhka Adeegga OR PTC DCI. La xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan.

Sidee ayaan ku badelyaa luuqada aan doorbidaayo anoo adeegsanaaya abka moobilka?

Dadka isticmaala abka moobilka, marka aad gasho Abka Moobilka OR PTC DCI, dooro Dookhyada kadibna Luuqada si aad u dejiso luuqada aad Door-bideyso.

Ka waran haddii aan ilaawo inaan ka baxo, kadibna aad dabco inaan ka baxo xili danbe anoo og in xirmadu ay khalad tahay una baahan tahay in la saxo. Wali ma qasab baa inaan xaqiijiyo cadeynta sheegaysa in wakhtigaygu sax yahay anagoo og inuusan sax ahayn? Maxay tahay inaan sameeyo?

Marka aad ka baxayso, waa inaad tigsartaa xaqiijinta. Reeb tilmaan sheegaysa waxa dhacay kadibna si dhakhso ah u gal oo sax xogta aad gelisay. Kadib marka aad ka baxdo, gal Barta Webseedka OR PTC DCI kadibna wax ka badel saacadaha aad gelisay si aad u hesho waqtiga saxda ah ee ka bixida (eeg [Si aad Wax Uga Baddesho Gelitaanka](#)).

Abka Moobilka OR PTC DCI oo Oflayn ah

Abka Moobilka oo Oflayn ah ayaa kuu sahlaaya inaad ku abuurto ilaa 10 gelitaan Abka Moobilka OR PTC DCI ilaa 5 maalmood oo xiriir ah adiga oo aan u baahanayninaad ku xirato khadka interneedka taleefanka ama Wi-Fi-ga.

Bilaabida Adeegsiga Abka Moobilka Oflaynka ah

Si aad u biloowdo Adeegsiga Abka Moobilka Oflaynka ah, waa inaad heshaa khadka taleefanka ama Wi-Fi-ga. Marka koobaad ee aad ka baxdo Abka Moobilka OR PTC DCI adoo adeegsanaaya aalada moobilka (sida taableed ama taleefan casri ah) adoo ku xiran interneedka, OR PTC DCI ayaa si otomaatig ah u diiwaan gelinaysa aaladaada. Waa inaad u adeegsataa aaladaan si Abka Moobilka ee Oflaynka ah u shaqeeyo.

Ma ka diiwaan gelin karaa wax ka badan hal aalad Abka Moobilka ee Oflaynka ah?

Abka Moobilka Oflaynka ah ayaa keliya ku shaqeyn kara aaladaada halka ah ee diiwaan gashan. Waxaad keliya lahaan kartaa hal aalad oo diiwaan gashan, aaladana waxaa keliya loo diiwaan gelin karaa hal isticmaale. Haddii aad u baahan tahay inaad baddesho aalada kuu diiwaan gashan, fadlan la xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan.




Aaladeydu waa diiwaan gashan tahay. Maxaa xiga?


Inta aad ku jirto Abka Moobilka OR PTC DCI, abka moobilka ayaa raadin doonta khadka interneedka. Haddii uusan jirin interneed, abka moobilka ayaa si otomaatig ah iskugu baddelaaya Abka Moobilka Oflaynka ah. Boorka “Khadka Tooska aan ahayn” ayaa kasoo muuqan doona qaybta sare ee shaashada abka moobilka marka uu oflayn yahay. Bogaaga hore ayaa muujinaaya batoonka Gelli Saacada-Gellitaanka. Dhammaan qaybaha kale iyo xogta ku qoran bogga hore ayaan la heli karin.

Maxaad Ku samayn Kartaa Abka Moobilka Oflaynka ah?

Waxaad, adoo ah adeeg bixiyaha, gelin kartaa wakhtiga biloowga iyo wakhtiga dhammaadka Abka Moobilka oo Oflayn ah. Tani waxaa ku jira:

- Gelitaanka Abka Moobilka OR PTC DCI
- Doorashada Saacada Gelitaanka
- Doorashada Saacada Bixitaanka
- Xaqiijinta Saacada Ka Bixida
- Raacinta sharaxaad inta aad ka baxayso shaqada
- Ka bixida Abka Moobilka OR PTC DCI





Sababo amaan awgood, xogta qaar ayaa la yareyn doonaa ama meel banaan noqon doonta. Waxaad keliya arkaysaa xarafka koobaad ee magaca koobaad iyo magaca ugu danbeeya ee macmiilka. Ma awoodi doontid inaad aragto Baaqiga Ogolaanshaha (tirada saacadaha la ogolaaday ee ka haray mudada shaqada).

Waxba iskama baddelayaan sida aad u geliso saacada biloowga iyo saacada dhammaadka Abka Moobilka Oflaynka ah. Raac talaabooyinkaaga caadiga ah si aad u geliso wakhtiga.


Muddo Intee dhan ayaad Oflayn Ahaan Kartaa?

Aaladu waxay keliya oflayn ahaan kartaa 5 maalmood oo xiriir ah. Waxaad keliya gelin kartaa 10 xirmooyin oo oflayn ah kahor inta aadan oonlaynka ku soo laaban. Haddii aad oflayn tahay wax ka badan 5 maalmood ama aad iskudaydo inaad samayso wax ka badan 10 xirmo, waxaad helayaa fariin sheegaysa: "Xadkaaga ugu sarreeya waa la dhaafay si loogu daro saacadaha shaqada qadla'aanta." Dooro Xaqiiji digniintaan.

Ma awoodi doontid inaad geliso wakhtiga biloowga markale ilaa inaad gasho maahee Abka Moobilka OR PTC DCI ayadoo aaladaadu ku xiriirsan tahay interneedka.

Maxaa dhacaaya marka aan galo abka moobilka marka aan ku soo laabto oonlaynka?

Gelitaanada aya lagu kaydin doonaa abka moobilka intii aad oflaynka ahayd. Marka aaladaadu ku soo laabato oonlaynka, waxaad heli doontaa digniin sheegaysa: "Waxaad ku soo noqotay khadka tooska ah/onlyanka ah Fadlan riix xaqijinta si aad u waafajiso xogtaada."



Si aad u dabaqdo xogaha aad gelisay kadib marka aad oonlayn ku soo laabato:

1. Dooro Xaqiiji digniinta si aad u soo geliso xogta aad gelisay abka OR PTC DCI.
2. Inta xogtaada lagu shubaayo, waxaad arkaysaa fariin sheegaysa: "Xogtaada qad la'aanta ah ayaa iswaafaweysa. Fadlan ha ka jarin internetka ama ha dilin barnaamijka haddii kale xogtaada ayaa lumi doonta."
3. Waxay qaadan kartaa dhawr daqiiqo in xogtaada lasoo galsho. Marka tani buuxsanto, xogaha aad geliso ayaa kasoo muuqan doonta batoonka Gelitaannada ee dookhyadaada.

Fiiro gaar ah: Xogaha aad geliso waa in la galshaa abka OR PTC DCI si aad lacag ugu hesho. Waa inaad gelisaa xogtaada kahor dhammaadka mudada ogolaanshaha ee ku ad Collective Bargaining Agreement (Heshiiska Gorgortan Wadareedka) si aad ugu hesho mushaarka xili mushaareedka markaas.

Waxaan wajahaya cilada xiriirka internetka; maxay tahay inaan sameeyo?

Marka aad iskudayayso gelitaanka Abka Moobilka OR PTC DCI, waxaad heli kartaa cilad sheegaysa: "Fadlan hubi Xiriirkaaga Internetka." Dooro Xaqiiji digniintaan. Haddii sidaan dhacdo, wax ayaa ka khaldan diiwaan gelinta aaladaada. Wac Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan. Waqti xaadirkaan, waa inaad ku xiriirisaa internetka si aad u gasho Abka Moobilka OR PTC DCI.





Fiiro gaar ah: Aalada ayaa keliya loo diiwaan gelin karaa hal isticmaale isticmaaluhuna wuxuu lahaan karaa hal aalad oo diiwaan gashan.

- Haddii aad gasho Abka Moobilka OR PTC DCI adoo adeegsanaaya aalad kale, aalada kale ayay u badan tahay inay adiga kugu diiwaan gashan tahay waana inaad ka saartaa diiwaanka kahor inta aan aalad cusub loo adeegsan qaabka oflaynka. La xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kaaga caawiyaan ka saarida diiwaanka aalad.
- Haddii qof kale ku jiro OR PTC DCI asagoo isticmaalaaya aaladaada, aalada ayaa laga yaabaa in ay ugu diiwaan gashan tahay isticmaalahaas Abka Moobilka Oflaynka ah.

Cilad Bixinta Qaybta Oflaynka ah

Haddii Abka Moobilka OR PTC DCI uu wareegaayo marka aad iskudaydo inaad shaqada ku biloowdo ama ka baxdo Qaybta Oflaynka ah ama abku uusan galayn Qaybta Oflaynka ah, iskuday talaabooyinka soo socda:

1. Ka codso xafiiska maxaliga ah inuu aaladaada ka saaro diiwaanka si loo xaliyo cilado kasta oo diiwaan gelinta aalada ah.
 - a. Haddii aaladaada marna loo adeegsaday in laga galo galka adeeg bixiye kale, waa in laga saaraa galkaas. Waa inaad u sheegtaa shaqaalaha adeeg bixiyaal kasta oo kale oo galay aaladaada.
 - b. Xubin kamid ah shaqaalaha ayaa ka saari doona aaladaada adeeg bixiye kasta oo galay abka asagoo adeegsanaaya aalada, oo adigu ku jirto.
 - c. Kadib marka aalada laga saaro diiwaanka dhammaan galalka, waxaad geli kartaa abka OR PTC DCI si aad u diiwaan geliso aalada.

Fiiro gaar ah: Haddii aad marna hesho aalad cusub, aaladaadii hore ayaa u baahan in laga saaro diiwaanka galka si aalada cusub loogu diiwaan gasho gelitaanka xiga. Tani ayaa ka dhigan inay qasab tahay inaad u sheegto xafiiskaaga maxaliga ah haddii aad badesho aaladaha aad isticmaalayso.

2. Xir interneetka Wi-Fi-ga/simkaarka.
 - a. Aaladaada ayaa ku xiran khadka interneetka Wi-Fi ga ama simikaarka oo daciif ah, Qaabka Oflaynka ayaan shaqeynayn. Xir Wi-Fi ga ama khadka aalada adoo galaaya Settings ka aalada kahor inta aadan gelin abka moobilka. Keliya samee talaabadaan haddii iyo marka aad dooneyso inaad isticmaasho Qaabka Oflaynka ah. Waxaad u baahan tahay inaad dib ugu xirto Wi-Fi ama khadka interneetka taleefanka 5 maalmood gudahood ama 10 xirmood oo aad oflayn ku geliso kadib si xogta loogu shubo nidaamka.
3. Xaqiiji inaad iskudayayn inaad doorato qaybo aan ku jirin Qaabka Oflaynka.



- a. Haddii aaladaadu ku xiran tahay Qaabka Oflaynka laakiin ay waxyar kadib istaagto ama iska wareegayso, waxaa laga yaabaa inaad iskudayday inaad eegto qayb aan lagu arki karin Qaabka Oflaynka. Inta aad ku jirto Qaabka Oflaynka, qaybaha keliya ee lagu heli karo waa waqtiga bilowga, wakhtiga dhammaadka, iyo ka bixida aalada. Xulashada qayb kale, sida Fariimaha ama Diiwaannada, ayaa keeni karta in abka moobilku shaqeyn waayo. Ha iskudayin inaad adeegsato qaybo kasta oo aan ahayn gelista/dhammaadka ama ka bixida in aad ku jirto Qaabka Oflaynka.

Laylaynka OR PTC DCI

Dookha Laylaynka OR PTC DCI ayaa ugu haboon macmiilka laylaynku ugu xiran yahay guriga iyo adeeg bixiyaha aan haysan aalada casriga ah.

Tani ayaa sidoo kale ah ikhtiyaar ku wanaagsan qof ku nool aag isticmaalka taleefanka gacanta/interneedka aan la isku halayn karin oo doorbidaaya inuusan adeegsan Abka Moobilka OR PTC DCI, uuna ku jiro Abka Moobilka Oflaynka ah. Laylaynka ayaa loo adeegsan karaa gelinta xogta markaas dhacaysa iyo midda taariikhda hore.

Si aad u awoodo inaad isticmaasho dookha Laylaynka OR PTC DCI:

- Macmiilku waa inuu haystaa taleefanka laylaynka ah oo yaala guriga aad adeegyada ka bixinayso, taleefankaan laylaynkuna waa inuu u diiwaan gashan yahay taleefanka rasmiga ah ee macmiilka ugu jira galka OR PTC DCI.

Xogta la Galsho isla marka ay dhacayso Laylaynka OR PTC DCI

U adeegsiga dookha Laylaynka OR PTC DCI xogta wakhtigaas ayaa ah qaab waafaqsan oo lagu gasho waqtiga bilowga iyo dhammaadka marka aad bilowdo iyo marka aad dhamayso tookada shaqada.

- Si aad u adeegsato dookha Laylaynka OR PTC DCI, macmiilku waa inuu haystaa lambarka taleefanka laynkiisa oo lagu daray galkiisa nidaamka; wuxuu la xiriiri karaa Xafiiska Maxaliga si loo siiyo xog dheeri ah.
- EVV-ga Laylaynka OR PTC DCI xogta markaas dhacaysa ayaa u baahan inaad wacdo kahor tookada shaqada aadna markale wacdo marka tookadu dhamaato. Lambarada lagu heli karo luuqada kaladuwan waa:
 - Ingiriis/Isbaanish: 1-844-856-9560
 - Ingiriiska/Fiyeednaamiiska: 1-833-640-1295
 - Ingiriis/Af-Ruush: 1-844-334-7318
 - Ingiriis/Mandarin: 1-844-331-0241
 - Ingiriis/Carabi: 1-844-311-4160

Fiiro gaar ah: Luuqada Ingiriiska waxaad wici kartaa midkood lambaradaan.

Kahor inta aadan wicin si aad u geliso xogta markay dhacayso:

- Xaqiiji inaad kasoo wacdo taleefanka laynlaynka ee u diiwaan gashan macmiilka.
- Diyaarso BIINKAAGA. (Tilmaan: Caadiyan, BIINKAAGA ayaa ah 4 god ee ugu danbaysa taleefan lambarkaaga. Haddii uusan jirin lambarka taleefanka rasmiga ah oo galka ugu jira, BIINKAAGA waa 0000.)

- Xaaladaha qaar, waxaad u baahan kartaa inaad geliso taariikhdaada dhalashada.

Fiiro gaar ah: Gelinta wakhtiga biloowgu waxay qaadanyasaa ku dhawaad 4-6 daqiiqo halka gelinta wakhtiga ka bixidu qaadaneysa 3-4 daqiiqo. Xaqiiji inaad haysato wakhti kugu filan si aad u geliso biloowga iyo dhammaadka shaqada.

Fiiro gaar ah: Haddii taleefankaagu xadidan yahay ama la xanibay, ma adeegsan kartid dookha Laynlaynka.

Laynlaynka – Saacada Gelitaanka Shaqada

Si aad u geliso wakhtiga biloowga shaqadaada:

1. **Wac** Lambarka Taleefanka OR PTC DCI ee luuqadaada.
2. Raac tilmaamaha si **aad u doorato luuqadaada**.
3. Marka lagu sheego, **geli** afarta god ee ugu danbaysa lambarkaaga social security.
4. Kadib fariinta xaqiijinta (taasoo ku soo baxaysa qaybta ogeysiiska ee bogaan), **geli** afarta god ee BIINKAAGA (tusaale: Caadiyan, BIINKAAGU waa afarta god ee ugu danbaysa taleefan lambarkaaga).
5. **Riix 1** shaqada Saacadleeyda ah.
6. Nidaamka ayaa akhrin doona magacyada macaamiisha leh lambarka taleefanka laynlaynka ah ee aad naga soo wacayso. **Dooro** Macmiilka saxda ah.
7. **Riix 1** si aad u geliso wakhtiga markaas taagan.
8. **Riix 1** si aad u xaqiijiso koodhka adeegga, (Tusaale: Saacadle ADL/IADL-1)
9. Nidaamka ayaa akhrin doona tirada saacadaha ka haray ogolaanshaha markaas jira. Haddii aad dooneyso inaad sii wado, **Riix 1**. Haddii kale, **Riix 2** si aad u jarto wicitaanka.
10. **Riix 1** si aad u kaydiso gelitaanka.

Laynlaynka – Saacada Ka bixida Shaqada

Si aad uga u geliso wakhtiga ka bixida shaqadaada:

1. **Wac** Lambarka Taleefanka OR PTC DCI ee luuqadaada.



Fiiro gaar ah: Fariinta xaqiijinta ayaa sheegaysa "Marka aan gasho BIINKAYGA, waxaan xaqiijinayaa inaan soo sheegay wakhtiyada biloowga iyo dhammaadka oo si sax ah u matalaaya wakhtiyada aan adeegyada/taageerooyinka siiyay macmiilka aan u shaqeeyo, waxaan keliya fuliyay shaqooyinka ku jira liiska shaqada ee macmiilka aan u shaqeeyo, waxaana ku dhaqmayaa xeerarka sida ku cad barnaamijka aan ka diiwaan gashanahay. Waxaan qirayaa in been abuurida xogtaan loo aqoonsan karo khiyaano ka dhan ah Medicaid. Waxaan fahmayaa in marka aan ka baxo, inaan riixi doono 1 anoo xaqiijinaaya in wakhtigaygu sax yahay iyo in been abuurida xogtu keenayso khiyaano ka dhan ah Medicaid."



2. Raac tilmaamaha si **aad u doorato luuqadaada**.
3. Marka lagu sheego, **geli** afarta god ee ugu danbaysa lambarkaaga social security.
4. Kadib fariinta xaqiijinta, **geli** afarta god ee BIINKAAGA (Tusaale: Caadiyan, BIINKAAGU waa afarta god ee ugu danbaysa taleefan lambarkaaga).
5. Nidaamka ayaa sheegi doona in ay jirto xirmo shaqo oo u furan macmiilkaan, ma dooneysaa inaad xirto. **Riix 1** si aad u xirto gelitaanka.
6. Diiwaanka ayaa sheegi doona, "Ma jiraan goobaha EVV oo hadda u furan macmiilkaan, ma doonaysaa inaad sii wado?" **Riix 1** si aad u sii wado.
7. Waxaad hadda maqli doontaa: "Jawaabaha diyaarsan ayaa ku xiran koodhkaan adeegga. Fadlan dooro ugu yaraan hal jawaab oo diyaarsan. Si aad u doorato "Wakhtigu waa sax. Been abuurku wa akhiyaano ka dhan ah Medicaid," fadlan dooro 1 si aad u geliso haa iyo 2 si aad u geliso maya." Waa inaad **riixdaa Haa (1)** si aad u bixiso xaqiijintaan.
8. Waxaad maqlaysaa: "Si aad u furto xirmo cusub, riix 1, ama riix 2 si aad u xirto." **Riix 2** si aad u jarto wicitaanka.

Gelitaannada xogta Taariikh hore ee Laylaynka OR PTC DCI

Gelitaannada Taariikhda Hore ee Laylaynka ayaa kuu sahlaya inaad geliso wakhtiga kadib marka tookadaadu dhammaato (tusaale: waxaad iloowday inaad geliso wakhtiga bilowga ama dhammaadka shaqadii Isniintii ugu danbaysay).


- Si aad u geliso wakhtiga taariikh hore adoo adeegsanaaya Laylaynka OR PTC DCI, ama wakiilkiisa, oo kula jooga xiliga wicitaanka.
- Waa inaad isticmaashaa taleefanka laylaynka macmiilka si aad u dirto wicitaanka.
- Si ka duwan EVV ga Taleefanka Hawsha Markaas socota, waxaad wacaysaa halmar badelkii aad labo jeer wici lahayd.
- Gelitaannada Taleefanka Laylaynka ah ee taariikhda hore ayaan ahayn kuwo waafaqsan EVV.
- EVV-ga Taariikhda ee Laylaynka OR PTC DCI ayaa kaa doonaaya inaad wacdo isla lambarka aad u adeegsato diiwaanka wakhtigaas dhacaaya:
 - Ingiriis/Isbaanish: 1-844-856-9560
 - Ingiriiska/Fiyeednaamiiska: 1-833-640-1295
 - Ingiriis/Af-Ruush: 1-844-334-7318
 - Ingiriis/Mandarin: 1-844-331-0241
 - Ingiriis/Carabi: 1-844-311-4160

Fiiro gaar ah: Luuqada Ingiriiska waxaad wici kartaa midkood lambaradaan.

Si aad u qorto gelitaanka taariikh hore:

1. **Wac** Lambarka Taleefanka OR PTC DCI ee luuqadaada.
2. **Geli** 4 god ee ugu danbaysa SSN-kaaga.
3. Kadib fariinta xaqiijinta, **geli** afarta god ee BIINKAAGA
4. **Riix** lambarka aad doonto si aad u sii wado.
5. **Riix 1** shaqada Saacadleeyda ah.
6. **Xaqiiji** Magaca Macmiilka marka uu soo baxo.
7. **Dooro 2** si aad u geliso Xirmada Taariikh Hore.

8. **Dooro** Koodhka Adeegga ee saxda ah ee ku jira tusaaleyaasha soo baxa (Tusaale: Saacadle ADL/IADL-1).
9. **Dhageyso** inta nidaamku akhrinaayo tirada saacadaha la heli karo ee ku jira ogolaanshaha, **Riix 1** si aad u sii wado ama 2 si aad u joojiso.
10. **U geli** Taariikhda Adeegga qaabka Bisha-Maalinta-Sanadka (Tusaale: Agoosto 1, 2021 u geli 08012021).
11. **U geli** Wakhtiga Biloowga qaabka HHMM (tusaale: 8:30 ayaa noqonaaya 0830).
12. Riix 1 si aad u geliso AM ama riix 2 si aad u geliso PM.
13. **U geli** Wakhtiga Ka bixida qaabka HHMM (tusaale: 4:45 ayaa noqonaaya 0445).
14. Riix 1 si aad u geliso AM ama riix 2 si aad u geliso PM.
15. Duubista ayaa ku celisay Faahfaahinta Xirmada, **Riix 1** si aad u xaqiijiso.
16. Diiwaanka ayaa sheegi doona, "Ma jiraan goobaha EVV oo hadda u furan macmiilkaan, ma doonaysaa inaad sii wado?". **Riix 1** si aad u sii wado.
17. **Dhageyso** xaqiijinta jawabata diyaarsan "Jawaabaha diyaarsan ayaa ku xiran koodhkaan adeegga. Fadlan dooro ugu yaraan hal jawaab oo diyaarsan. Si aad u doorato "Wakhtigu waa sax. Been abuurku wa akhiyaano ka dhan ah Medicaid," fadlan dooro 1 si aad u geliso haa iyo 2 si aad u geliso maya."
18. **Riix 1** si aad u doorato Haa.
19. **Dhageyso** inta nidaamku akhrinaayo faahfaahinta xirmada. **Riix 1** si aad u xaqiijiso ama 2 si aad wax uga badesho.
20. **Biloow** Xaqiijinta Macmiilka, U dhiib taleefanka macmiilka.
21. Macmiilka ha **Riix 1** marka uu diyaar yahay.
22. Macmiilka ayaa dhageysanaaya faahfaahinta xirmada, **Riix 1** si aad u Aqbasho ama 2 si aad u Diido.
23. Macmiilka ayaa **Gelinaaya** BIINKIISA si uu u xaqiijiyo.
24. Wicitaanka ayaa si otomaatig ah u jarmaaya.



Su'aalaha iyo Jawaabaha Laylaynka OR PTC DCI

Nidaamku ma aqoonsanaayo BIINKAYGA. Maxay tahay inaan sameeyo?

BIINKAAGA waxaa awal laga dhigay inuu noqdo afarta god ee ugu danbaysa taleefan lambarkaaga rasmiga ah. Haddii aan lambarka taleefan kuugu jirin diiwaanka marka aad samaysatay galka, BIINKAAGU waa 0000. Waxaad ka baddeli kartaa BIINKAAGA Barta Webseedka adoo galaaya Habeynada. Eeg [Baddel BIINKA](#) si aad u hesho xog dheeri ah.

Markii aan geliyay saacada biloowga, waxaan helay fariin codeed sheegaysa inaan koontadaani lahayn ogolaanshaha shaqeynaaya. Maxay tahay inaan sameeyo?

Tan waxay ka dhigan tahay inaad haysan ogolaanshaha macmiilkaan iyo Koodhka Adeegga ee OR PTC DCI. La xiriir Xafiiska Maxaliga si ay kuu caawiyaan.



Marka aan ka baxo, waxaan helaa fariin codeed oo sheegaysa in xirmadaan la diiday, maxay ka dhigan tahay?

Waxaa jira dhawr sababood oo kala duwan oo gelitanakaaga loo diidi karo. Mid kasta waxay leedahay fariin gaar ah.

Dookha koobaad, haddii aad maqasho fariinta soo socota inta aad ka baxayso shaqada kadib marka aad xaqiijiso bayaanka xaqiijinta, waxay ka dhigan tahay inaad jebisay xeerka ganacsiga ee Baaqiga Haray ee Ogolaanshaha.

"Xirmadaan waa la diidi doonaa, ma haysatid tiro ama lacag kugu filan oo ku jirta ogolaanshaha si loo taageero xirmadaan. Fadlan la xiriir kormeerahaaga. Waad ku mahadsan tahay inaad wacdo nidaamka Diiwaanka Wakhtiga Adeeg Bixiyaha ee Oregon. Macsalaamo."

Tani ayaa ka dhigan in gelitaankaagu ka batay saacadaha lagu ogol yahay muddo mushaareedka markaas. Gelitaanka si otomaatig ah ayaa loo diidi doonaa, kumana helaysid lacag. Si aad lacag ugu hesho wakhtiga aad shaqeysay, waa inaad abuurtaa gelitaanka wakhti lasoo dhaafay oo ah cadadka wakhtiga ku cayiman ogolaanshahaaga. La xiriir Xafiiska Maxaliga haddii aad u baahan tahay caawimaad.

Dookha labaad, haddii aad maqasho fariinta soo socota inta aad ka baxayso shaqada kadib marka aad xaqiijiso bayaanka xaqiijinta, waxay ka dhigan tahay inaad iskudayday inaad sheegato wax ka badan 16 saacadood hal xirmo gudaheed.

"Xirmadaan waa la diidi doonaa maadaama wadarta guud ee xirmadu aysan ka badnaan karin 16.00. Waxaad gelisay xx. Waad ku mahadsan tahay inaad wacdo nidaamka Diiwaanka Wakhtiga Adeeg Bixiyaha ee Oregon. Macsalaamo."

Tani ayaa ka dhigan in saacadaha aad gelisay ay ka badan yihiin 16 saacadood. Gelitaanka si otomaatig ah ayaa loo diidi doonaa, kumana helaysid lacag. Si aad lacag ugu hesho wakhtiga aad shaqeysay, waa inaad abuurtaa gelitaanka wakhti lasoo dhaafay oo ah cadadka wakhti kayar 16 saacadood. La xiriir Xafiiska Maxaliga haddii aad u baahan tahay caawimaad.

Dookha saddexaad, haddii aad maqasho fariinta soo socota inta aad ka baxayso shaqada kadib marka aad xaqiijiso bayaanka xaqiijinta, waxay ka dhigan tahay inaad jebisay xeerka ganacsiga ee Diiwaanka Xirmada Taariikhda Dhammaadka Koontada Adeegga ee Shaqaalaha.

"Xirmadaan waa la diidi doonaa, maadaama aad iskudayayso inaad geliso xirmada taariikhda adeeg ka baxsan taariikhda uu dhamaaday adeeggaaga shaqaaluhu. Fadlan la xiriir kormeerahaaga. Waad ku mahadsan tahay inaad wacdo nidaamka Diiwaanka Wakhtiga Adeeg Bixiyaha ee Oregon. Macsalaamo."

Tani waxaa ku jira taariikhda ku qoran OR PTC DCI oo sheegaysa inaad hadda kadib u shaqeynaynin macmiilkaan. Ma awoodi doontid inaad geliso waqtiga taariikhda kadib taariikhda aad u gelisay maalinta ugu danbeysay ee aad la shaqeysay macmiilkaan. Haddii aad u shaqeysay macmiilkaan, la xiriir Xafiiska Maxaliga ah si aad ugu sheegto inaad u shaqeysay macmiilkaan. Ku

sheeg inay jirto taariikhda dhammaadka aalada OR PTC DCI. Xafiiska Maxaliga ayaa intaas kadib la xiriiri doona Kooxda Taageerada ee PTC si aad meesha uga saarto taariikhda. Kadib marka hawshaan soo dhamaato, waxaad awoodi doontaa inaad geliso waqtiga macmiilkaan.

Marka dib laguugu xiriiriyo macmiilkaa, si aad lacag ugu hesho waqtigaan, waa inaad gelisaa diiwaanka taariikhda si aad u soo sheegto wakhtiga tookadahaas oo dhan. Eeg [Gelitaannada xogta Taariikh hore ee Laylaynka OR PTC DCI](#) si aad u hesho xog dheeri ah.

Maxaa sababi kara in wicitaanka la jaro/dhammaado marka aad iskudayayso inaad geliso wakhtiga gelitaanka/bixitaanka?

Waxyaabaha soo socda ayaa sababi kara in wicitaanka la jaro:

- Daahid, ama sugitaanka muddo dheer, si aad u riixdo batoon kadib marka lagu sheego
- Inaadan riixin 1 bayaanka cadeynta/jawaabta diyaarsan.
- Gelinta BIIN khalad ah ama afarta god ee SSN-kaaga
- Inaadan gelin BIINKAAGA kadib xaqiijinta
- Lambarka taleefanka Laynlaynka macmiilka ayaa xiran ama xaniban

OR PTC DCI Fob

The OR PTC DCI Fob ayaa ah qaab kale oo EVV oo lagu adeegsan karo guriga macmiilka.

- Fob waa aalad yar oo ay qasab tahay inay dhex taalo guriga macmiilka.
- Waa qasab inaad awoodo inaad gasho interneedka ugu yaraan halmar muddo mushaareedka si aad u geliso wakhtiyada Barta Webseedka OR PTC DCI.



Fiiro gaar ah: Riixida batoonka **ma** qorayso wakhtiga. Koodhka soo baxa ayaa loo adeegsadaa xaqiijinta inaad shaqada biloowday marka aad sheegtay inaad biloowday.

Adeegsiga OR PTC DCI Fob

1. Biloowga tookada shaqada, waxaad helaysaa OR PTC DCI Fob kaasoo yaala meel cayiman oo guriga macmiilka kamid ah. Riix batoonka cas ee fob si aad u biloowdo tookada shaqada. Ku qor koodhka 6 god ah iyo wakhtigaaga biloowga waraaqda wakhtiga.
2. Dhammaadka tookada shaqada, waxaad helaysaa OR PTC DCI Fob mar labaad. Riix batoonka cas ee fob si aad u dhamayso tookada shaqada. Ku qor koodhka 6 god ah iyo wakhtigaaga dhammaadka waraaqda wakhtiga.

Saacadu waa 7:59AM,
koodhka fob waa xxxxxxxx



Fiiro gaar ah: Haddii aad riixdo batoonka lambaraduna aysan sii muuqan muddo ku filan inaad lambarka qorto, riix batoonka markale kadibna qor lambarka cusub ee soo baxa. Lambarkan labaad ayaad gelinaysaa marka aad abuurayso diiwaanka fob.

Xaashida Wakhtiga ee OR PTC DCI Fob

- Wakaalada ayaa abuurta xaashida wakhtiga oo ikhtiyaari ah si aad ugu adeegsato inay kaa caawiso diiwaan gelinta tookanadaada fob. Waraaqahaan waxaa sidoo kale laga heli karaa PTC.Oregon.gov (dooro Agabka Waxbarashada ee geeska gacanta bidix). Xaashida Wakhtiga ee fob **ayaan** loo gudbin karin Xafiiska Maxaliga si lacag loogu dalbado.
- Waa inaad gelisaa xogta FOB ee lagu soo uruurshay xaashiyaha wakhtiga Barta Webseedka OR PTC DCI.
- Kahor intaysan dhammaan mudada lacag-bixinta, gal Barta Webseedka OR PTC DCI adoo isticmaalaaya web ku shaqeynaaya aalada si aad u geliso wakhtigaaga. Tusaaleyasha aalada webka ku shaqeynaaya waxaa ku jira kumbuyuutaada, laabtoobada, taleefannada casriga ah, iyo taableedyada.



Fiiro gaar ah: Waxaad wali helaysaa isla mudada ogolaanshaha si aad ugu gudbisno diiwaanada Wakaalada isla sida aad ku samaysay hawsha boonada waraaqda ah si aad mushaarka ugu hesho wakhtigiisii. Arag Jadwalka Mushaarka ee HCW/PCA si aad u hesho faahfaahin.

Xaashida Shaqada OR PTC DCI

Magaca Daryeel bixiyaha: _____

Magaca Macmiilka: _____

Wakhtiga Adeega: _____ Masaafada La Socdo: _____

***Ha gudbin xaashiyaha shaqada ee fob. Kuwani waxaa loogu talagalay in aad kaliya diiwaan ahaan u haysato.** Macluumaadka waqtiga shaqo waa in Nidaamka Internet-ka ee OR PTC DCI (<https://orptc.dcisoftware.com/>) lagu geliyaa muddo aan ka dambeyn 3 maalmo shaqo ka dib wakhtiga adeegu ku eg yahay taasi oo loogu talagalay lacag bixin waqtigeeda lagu halo.

Taariikhda Adeega	Waqtiga Saacada La Garaacdo		Waqtiga Shaqada Laga Baxo	
MM/DD/YY	HH:MM	SUBAXDII/GALABTII	HH:MM	SUBAXDII/GALABTII
Saacad garaacashada Fob:	Shaqo ka bixista Fob:
Hawlaha La bixiyay:				
Taariikhda Adeega	Waqtiga Saacada La Garaacdo		Waqtiga Shaqada Laga Baxo	
MM/DD/YY	HH:MM	SUBAXDII/GALABTII	HH:MM	SUBAXDII/GALABTII
Saacad garaacashada Fob:	Shaqo ka bixista Fob:

Su'aalaha iyo Jawaabaha OR PTC DCI Fob

Waan riixay batoonka, laakiin lambarka ayaa qarsoomay kahor intaan qorin! Maxay tahay inaan sameeyo?

Fob waxay leedahay wakhti tiriye ku dhex samaysan. Tani ayaa kasoo muuqanaysa geeska bidix ee lambarada ayadoo ah tiro layman ah (arag falaarta buluuga ah ee ku jirta sawirka). Marka la riixo batoonka cas, waqti xisaabiyaha ayaa soo baxaaya, oo laymanka ayaa meesha ka baxaaya marka wakhtigu dhamaado. Haddii aad riixdo batoonka biloowga ee cas ayna muuqdaan keliya hal ama labo layn, sug wakhti tiriyuhu ka joogsadee kana soo bixiyo shaashada maran ee biloowga. Riix batoonka cas ee biloowga markale kadibna koodh cusub ayaa soo baxaaya oo ku siinaaya wakhti dheeri ah oo aad ku qorato koodhka.



Waxaan si lama filaan ah u riixay batoonka wax ka badan halmar! Maxay tahay inaan sameeyo?


Haddii aad riixdo batoonka markale ama koodhka cusub ee fob ayaa soo bixi doona. Koodhadhka fob ee horey loosoo bandhigay ayaan markale soo bixi doonin marka ay qarsoomaan. Qor koodhka cusub ee fob ee soo baxa.

Barta Webseedka OR PTC DCI

Ka bixiye ahaan, waxaad adeegsan doontaa Barta Webseedka OR PTC DCI si aad:

- U aragto boggaaga hore.
- U adeegsato Qaybta Fariimaha ee OR PTC DCI.
- Ugu darto diiwaannada wakhtiga fob (haddii aad adeegsanayso dookha fob).
- Kudarto diiwaannada wakhtiga hore.
- Ugu darto diiwaannada badka.
- Aad aragto, wax uga baddesho, aadna u maareyso diiwaanadaada.
- Inaad gasho Xarunta Caawimaada DCI.


Aan akhrino kuwaan midba mar.



Gelitaanka Barta Webseedka OR PTC DCI

Aan marka hore fahano sida loo galo Barta Webseedka OR PTC DCI. Adoo adeegsanaaya kumbuyuutarka wayn ama laabtoob, raac tilmaamahaan:

1. Gal barta orptc.dcisoftware.com.
2. Geli magaca isticmaalaha iyo lambarka sirta ee lagu siiyay (eeg [Xogta magaca isticmaalaha iyo Lambarka sirta](#)).
3. Dooro Gal.



Fiiro gaar ah: Waxaad baddeli kartaa luuqada bogaaga gelitaanka adoo ka dooranaaya batoonka luuqada geeska kore ee midigta. Luuqada caadiyan ku xiran waa Ingiriis.

Waxaan ku talinaynaa inaad webseedkaan ku kaydiso baroowsarkaaga.

Kadib marka aad gasho, waxaad arkaysaa Ogeysiiska Xaqiijinta Adeeg Bixiyaha iyo Isticmaalka Nidaamka. Xaqiijinta Adeeg bixiyuhu waxay sheegaysaa in adiga, oo ah adeeg bixiye, aad gelin doonto waqtiga bilowga iyo dhammaadka ee saxda ah aadna keliya qabanayso shaqooyinka ku qoran liiskaaga la ogolaaday. Marka aad doorato Waayahay gudaha Xaqiijinta Adeeg bixiyaha, waxaad qiraysaa in ka been abuurista xogtaan ay ka dhigan tahay khiyaano aad ka gashay Medicaid. Marka aad gelinayso waqtiga dhammaadka ama aad abuuraysa diiwaanka wakhtiga, waxaad qiraysaa Xaqiijinta Adeeg bixiyaha markale adoo tigsaraaya odka ama riixaaya 1 oo ka dhigan haa marka aad isticmaalayso layn-laynka.

Ogeysiiska Isticmaalka Nidaamka ee soo baxaaya marka aad gasho ayaa sheegaaya in OR PTC DCI la muraaqabeynaayo lana diiwaan gelinaayo. Ujeedada nidaamku waa in lala socdo saacadaha ay shaqeeyeen adeeg bixiyaasha loo ogol yahay iyo in la xaqiijiyo in tilmaamaha EVV ee gobalka iyo federaalka lagu dhaqmo. OR PTC DCI waxaa ku jira xog shaqsi ah oo qarsoodi ah. Marna xogtaada gelitaanka hala wadaagin cid kale. Marka aad adeegsato nidaamka, waxaad aqbalaysaa shuruudahaan. Fadlan si taxadar leh u akhri Cadeeynta Bixiyaha iyo Nidaamka Isticmaalka



Ogeysiiska. Waxaa laga yaabaa inaad aragto Boostiyada Wararka kale oo ku siinaaya tilmaamo, xog ku saabsan isbadellada nidaamka.

Akhri kadibna dooro Waayahay si aad u xaqiijiso una aqbasho xogta ku qoran Boosti Kasta oo Wareed.



Qoraalada Wararka

Mawduuca - Nidaamka Isticmaalka Ogeysiiska

Fariin:
Isticmaaluhu wuxuu helayaa nidaam xaddidan. Isticmaalka nidaamka waxaa laga yaabaa in lala socdo, duubo, oo ku xiran xisaabinta. Isticmaalka aan la ogolayn ee nidaamka waa mamnuuc waxaana laga yaabaa inay ku xiran tahay ciqaabta dembiyada, madaniga ah, ama xukunka maamulka. Isticmaalka nidaamka ka dhigan ogolaansho in la socodka iyo wax lagu qoro. Ujeedada goobta waa in la oggolaado ka qaybgalayaasha oggolaanshaha ee Madaxbanaanida Mashruuca Oregon, Qorshaha Gobolka ee Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee qaybta Nidaamka Caafimaadka ee OHA iyo Qaybta Dadka Naafada ah ee ODHS iyo Dadka Naafada ah, iyo Barnaamijka Bixiyaha Shaqaaleysiinta ee Guriga si ay ula socdaan bixinta adeegyada la oggol yahay .
Waxaa lagu oggol yahay oo keliya inaad isticmaasho boggan, ama macluumaad kasta oo laga helo boggan, ujeedadeeda loogu talagalay. Helitaanka aan la ogolayn ama wadaagista aan la ogolayn ee macluumaadka shakhsiyeed iyo qarsoodi ah waxaa lagu ciqaabi karaa ganaax waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka. Helitaanka aan la ogolayn ama qaybsiga aan la ogolayn sidoo kale waxaa laga yaabaa in dambi ciqaab. Gobolka Oregon socota sharciga iyo xeerarka federaalka iyo gobolka si ay u ilaaliyaan macluumaadka ka si xun ama helitaanka aan la ogolayn.

[Waayahay](#)



Qoraalada Wararka

Mawduuca - Cadeeynta Bixiyaha


Fariin:
Bygujinaya "OK", Waxaan xaqiijinayaa in jeer bilowga iyo dhamaadka sheegay si sax ah ka dhigan jeer in aan bixiyo adeegyada/taageero macaamilka-oo shaqeeyaha. Waxaan sameeyaa oo kallya hawlaha kuwaas oo sida ku cad liiska hawsha macaamilka-shaqeeyaha ee, oo waxaan raacayaa xeerarka si waafaqsan barnaamijka aan ku qoran ahay. Waxaan qirayaa in been macluumaadkan waxaa loo tixgelin karaa musuqmaasuq Medicaid. Waxaan fahamsanahay in markii aan saacad baxay, Waxaan hubin doonaa sanduuq cadeynaya in aan waqti sax yahay iyo macluumaad been ah waxaa loo tixgelin karaa musuqmaasuq Medicaid.

Taariikhda la Sameeyay: Aug 08, 2022 07:41:23 AM
Waxaa Sameeyay:

[Waayahay](#)

Dulmarka Bogga hore ee Barta Webseedka OR PTC DCI

Bogga hore ayaa ah waxa koobaad ee aad arkaysa kadib Boostiyada Wararka. Aan eegno qayb kasta oo kamid ah Shaashadaada hore midba mar.



Fiiro gaar ah: Wakaalada ayaan adeegsan doonin Shahaadooyinka Dhacaaya ama qaybaha Tababarka Oonlaynka ah ee Bogga Hore waqti xaadirkaan.

Boggaaga hore waxaad ku arkaysaa waxyaabaha soo socda:

1. Dookhyada hoos kasoo baxaaya oo ay ku jirto luuqadaada hooyo
2. Ciwaanka isticmaalaha
3. Lifaag aad ka galayso Xarunta Caawimaada DCI
4. Calaamada boqshada oo ku gaynaysa Qaybta Fariimaha
5. Fariimo muhiim ah oo ka imaanaaya Wakaalad la Yiraahdo Boostiyada Wararka.
6. Batoonka GELITAANKA - Dooro dookhyadaan si aad u aragto dhammaan diiwaannada wakhtiga ee aad waligaa samaysay
7. Batoonka AKOONTAYAASHA - Dooro dookhaan si aad u aragto liiska macaamiisha aad la shaqeyso iyo haddii ay jiraan saacado, badad, ama labadaba oo lagu xilsaaray
8. CADDEYNTA BOROFAYLKA - Dookhaan ayaan la adeegsan doonin hadda
9. Qiyaasta Wakhtiga- Qaybtaan ayaa muujinaysa cadadka saacadaha aad shaqeysay intii lagu jiray asbuuca hadda ee shaqada
10. Wadarta Saacadaha- Tani waxay muujinaysaa tirada saacadaha aad gelisay ee ka gudbay dhammaan xeerarka ganacsiga (La ogolaaday); tirada saacadaha aad gelisay ee aan wali la ogolaan (Sugaya); tirada saacadaha la gashay ayadoo wakiil lagaa yahay kuwaasoo u baahan



xaqiijintaada (Aan la Xaqiijin); iyo wadarta guud ee saacadaha aad shaqeysay intii lagu jiro asbuuca hadda ee shaqada

- Galka Oggolyada - Kani wuxuu muujinayaa cadadka saacadaha lagu ogolaaday iyo cadadka aad wali codsan karto ee macmiil gaar ah muddo mushaareed gaar ah

The screenshot shows the GURI dashboard with the following elements highlighted by numbered callouts:

- 1:** Language selection dropdown menu (Soomaali).
- 2:** User profile information (patrick.stum...).
- 3:** Location selection (Kaalmo).
- 4:** Search bar.
- 5:** News section (Qoraalada Wararka).
- 6:** Navigation menu (GELITAANKA).
- 7:** User profile information (AKOONTAYAASHA).
- 8:** Navigation menu (CADDEYNTA BOROFAVUKA).
- 9:** Performance overview for Patrick Stump, including a gauge and a table of service metrics.
- 10:** Detailed service metrics table.
- 11:** Search filters for 'Oggolyada' (Qor magaca macmiilka, Taariikhda Adeegga).


Metric	Value
La ogolaaday:	1.14
Saacadaha la sugaya:	0.25
Saacado Aan La Xaqiijin:	0.00
Wadarta Saacadaha:	1.39

Fiiro gaar ah: Cabirka Saacadaha Shaqada Dheeriga ah iyo Wadarta Guud ee Saacadaha ayaa keliya muujinaaya saacadaha asbuuca. Qaybahaan ayaan sheegayn cadadka saacadaha Maareeyaha Kiisku kuu ogolaaday inaad shaqeyso ama cabirka asbuuc kasta ee lagu xilsaaray. Haddii aad dooneyso inaad hesho xogtaas, la xiriir Xafiiska Maxaliga.




Sida loo adeegsado Galka Oggolyada

1. Kadib marka aad gasho barta webseedka, waxaad tagaysaa bogga koobaad ama bogga hore. Hoos u dago si aad u aragto qaybta Oggolyada oo ku taala dhexda bogga. Kan waxaa loogu yeeraa Galka Oggolyada.
2. Biloww inaad ku qorto magaca macmiilka godka Qor Magaca Macmiilka. Marka 3 xaraf ama ka badan la qoro, liis ayaa hoos kasoo baxaaya. Ka dooro magaca macmiilka liiska hoos kasoo baxaaya.



3. Dooro godka Taariikhda Adeegga la baxshay. Marka aad gasho jadwalka taariikhda, ka dooro taariikh ka mid ah mudada mushaarka ee aad dooranayso. Tusaale, haddii aad dooneyso inaad ogaato Baaqiga Kuu haray muddo mushaareedka markaas lagu jiro, geli taariikhda maanta.
4. Dooro Raadi.
5. Dhammaan ogolaanshiyaasha macmiilkaan iyo mudada mushaarka ayaa soo bixi doona. Koodhka Adeegga ayaa muujinaaya inuu yahay tiro saacadeed ama mid bad ku saleysan.
6. Baaqiga Hadda la Hello karo ee mudadaan ayaa ku qoran geeska midig ee Baaqiga Hadda La heli Karo.



Koodhka Adeegga	Taariikhda bilowga	Taariikhda Dhammaadka	Baaqiga Bilowga	Baaqiga Haray	Heysashada Oggolaanshaha ka mid	Baaqiga Hadda la Hebo karo
Hourly ADL/IADL-1	01/09/2023	02/11/2023	20.00	0.50	0.25	0.25
Milaaga-1	01/09/2023	02/11/2023	10.00	10.00	1.00	5.00

Akoontayaasha Webseedka OR PTC DCI

Qaybta Akoontayaasha, waxaad ku arkaysaa dhammaan macaamiisha aad ku shaqayso. Qaybtaan waxaa loogu talo galay in xog aad ka hesho keliya. Uma baahnid inaad qaado wax talaabo ah qaybtaan.

Magaca Macaamiilka/Magaca Shaqaalaha	Nooca Acoonka	Koodhka Adeegga	Xarunta Qiimaha	Nooca Qeybta	Xaaladda
Pete Wentz	Gaadidka Macaamiisha	Mileage-1	St Helens APD-EU	Maylyada	Shaqeeya
Pete Wentz	Saacaddii	Hourly ADU/IADL-1	St Helens APD-EU	Saacaddii	Shaqeeya

Guudmadka Qaybta Fariimaha ee Barta Webseedka OR PTC DCI

OR PTC DCI waxay leedahay nidaamkeeda gaarka ah ee fariimaha. Tani waxay kuu sahlayso inaad dirto fariimo amaan ah oo aad u xirayso qofka aad kala xiriirayso Xafiiska Maxaliga. Waxaad sidoo kale heli kartaa fariimaha sistamku sameeyo oo ka imaanaaya OR PTC DCI. Qaybta sare ee bogaaga hore, waxaad ku arkaysaa digniin cas haddii aad hesho fariin aad muhiim u ah. Ma heli doontid digniinta fariimaha aan loo astayn kuwo muhiimad sare leh. Si aad u aragto fariimahaaga, dooro calaamada boqshada kadibna dooro Eeg Dhammaan Fariimaha.

Fiiro gaar ah: Qaybta Fariimaha ee OR PTC DCI waa inaan loo adeegsan xiriirada xaaladaha degdega ah.

Si aad u aragto fariimahaaga ku jira qaybta fariimaha, gal aalada OR PTC DCI kadibna raac talaabooyinka soo socda:

1. Dooro boqshada ku jirta qaybta kore ee midig ee shaashada.
2. Dooro Eeg Dhammaan Fariimaha


Fiiro gaar ah: Fariimaha leh Muhiimada Sare ayaa samayn doona digniin casaan ah oo kasoo baxaysa qaybta sare ee Bogga hore OR PTC DCI marka ay galaan.

Waxaa lagu gayn doonaa Qaybta Fariimaha.




Si aad u akhrido fariin ku jirta Sanduuqa fariimaha:

1. Dooro fariinta




2. Akhri fariintaada ku jirta bogga Faahfaahinta Fariinta



Hadda, aan barano sida aad fariin qoraal ugu diri karto Xafiiska Maxaliga adoo adeegsanaaya Qaybta Fariimaha.

Si aad u dirto fariin:

1. Dooro Ficillada.
2. Dooro Fariin Cusub



3. Talaabada xigta, buuxi godadka soo socda:
 - a. Ku: Biloow inaad qorto 3-da xaraf ee ugu horeeya magaca koobaad ama ugu danbeeya ee qofka aad dooneyso inaad fariin u dirto kadibna ka dooro magaca liiska dookhyada hoos kasoo baxaaya marka ay soo muuqdaan.
 - b. Mawduuca: Ku qor mawduuca fariinta godka Mawduuca.
 - c. Mudnaanta: Dooro heerka muhiimada oo ku jira dookhyada hoos kasoo baxaaya.
 - i. Ka dooro Hooseeya, Dhexe, ama Sareeya dookhyada soo baxaaya ee godka Muhiimada.
 - d. Ku qor fariinta godka Fariinta.
 - e. Dooro batoonka Dir.

The screenshot shows a web form titled 'Fariin Cusub' with the following fields and annotations:

- Field a:** 'Iilaa:' with the value 'Dor Magaca Qaataha'.
- Field b:** 'Mawduuca:' with the value 'Mawduuca'.
- Field c:** 'Mudnaanta:' with the value 'Hooseeya'.
- Field d:** A large text area for the message content, currently empty.
- Field e:** A 'Dir' button at the bottom right.

Below the text area is a rich text editor toolbar with options for Bold (B), Italic (I), Underline (U), Strikethrough (S), Bulleted List, Numbered List, Indent, Outdent, Undo, Redo, and Font Color. Below the toolbar are labels for 'Styles', 'Format', 'Font', and 'Size'.

Barta Webseedka OR PTC DCI Su'aal iyo Jawaab

Sidee ayaan ku badalyaa luuqada aan doorbidaayo anoo adeegsanaaya Barta Webseedka OR PTC DCI?

Adoo adeegsanaaya Barta Webseedka OR PTC DCI, shaashada luuqada aad doorbideyso ayaa la badeli karaa adoo ka dooranaaya liiska hoose ee Luuqada oo ku yaala geeska kore ee gacanta midig ee shaashada.

Maxaan ugu baahan nahay inaan badelo baasweerkayga?

Baasweerada waa in la badelaa 60 maalmood kasta sababo amaan awgood.

Sidee ayaan u dirayaa fariin?

Dooro calaamada baqshada, kadibna Ficillada, kadibna Fariin Cusub barta webseedka. Abka moobilka, dooro calaamada baqshada kadibna calaamada buluuga ah ee Fariin Cusub oo ku jirta qaybta hoose ee geeska midig.

Sidee ayaan ku fiirinayaa fariimaha?

Dooro calaamada baqshada kadibna dooro fariinta aad dooneyso inaad aragto.

Sidee ayaan ku xaqiijin karaa inaan helo ogeysiisyada fariimaha qoraalka ah?

Barta Webseedka OR PTC DCI, dooro settings kadibna xaqiiji moobilka. Geli lambarka taleefankaaga kadibna dooro Cusbooneysii Lambarka Moobilka. Eeg [Xaqiiji Lambarka Taleefanka Moobilka](#) si aad u hesho dheeri ah.

Ku darista Gelitaan Barta Webseedka OR PTC DCI

Gelitaanka ku darista Fob Barta Webseedka

Adeegso Barta Webseedka OR PTC DCI si aad u geliso gelitaanadaada xaashiyada wakhtiga ee fob. Tan ayaa la samayn karaa dhammaadka mudada mushaarka; qasab maaha in la gasho maalin kasta.

Fiiro gaar ah: Gelitaannada Fob ayaa u baahan in la galsho barta webseedka kahor wakhtiga loo cayimay dirista muddo mushaareedkaas si loo xaqiijiyo in lacagta lagu baxsho wakhtigeeda.

Ku biloow inaad **ka doorato** Kudar Gelitaan Bogga Hore





Buuxi godadka soo socda si aad ugu darto gelitaanka fob:

1. **Nooca Akoonka:** Dooro Saacadii
2. **Macaamiil:** Bilow inaad qorto magaca macmiilka kadibna dooro magaca marka uu soo baxo
3. **Koodhka Adeegga:** Dooro koodhka adeegga oo sax ah ayadoo lagu saleynaayo barnaamijka macmiilka ee aad codsanayso saacadihiisa
4. **Taariikhda Adeegga:** Taariikhda aad shaqeysay
5. **Is xaadiri:** Bilowga tookada shaqada (ilaa daqiiqada)
6. **Kabaxid:** Dhammaadka tookada shaqada (ilaa daqiiqada)

Fiiro gaar ah: Si aad u geliso wakhtiga ilaa daqiiqada, dooro godka si aad u saarto gacanka, kadibna gadaal u dir oo ku qor wakhtiga saxda ah.

The screenshot shows a web form titled 'Kudar Gelitaan Cusub'. It contains several input fields and dropdown menus. Numbered callouts (1-12) point to specific fields: 1. Nooca Akoonka (Saacada), 2. Macaamiil (Pete Wentz - FOB1999), 3. Koodhka Adeegga (Hourly ADL/IADL-1), 4. Taariikhda Adeegga (05/30/2023), 5. Is xaadiri (10:00), 6. Kabaxid (11:10), 7. Habka EVV (Aminiga FOB), 8. Tikidhka Bilow (855362), 9. Dhamaadka Token (879268), 10. Qoraalada (Kudat Qoraal loogu talagalay Saacadaha-shaqo), 11. Qoraalada (Time is correct. Falsifying may be Medicaid fraud), and 12. The 'Keydso' button.

Fiiro gaar ah: Wakhtiga ayaa soo bandhigaaya wakhtiga milatariga ee dhammaan luuqadaha marka laga reebo Ingiriiska.

7. **Habka EVV:** Dooro FOB Amaan ah
8. **Tikidhka Bilow:** Koodhka lixda god ah ee aad hesho saacada gelitaanka
9. **Dhamaadka Token:** Koodhka lixda god ah ee aad hesho saacada ka bixida
10. Kudar **Qoraalada** iyo **Lifaaq** haddii aad dooneyso
11. Tigsaar xaqiijinta si aad u xaqiijiso in wakhtiga aad gelinayso uu sax yahay.
12. **Door** Keydso si aad u dirto wakhtiga
13. **Ku celi** talaabooyinka 1 - 12 gelitaanka fob kasta



Gelitaannada Fob - Tookeenno Khalad ah

Haddii aad geliso wakhtiga aan waafaqsanayn tookenka Fob, fariinta soo socota ayaa soo baxaysa:

Waxaad arkaysaa cilada: "Tikidhka Batoonka Bilaabka iyo Dhamaadka Soo noqonoqshada ku shageeya ansax ma ahan. Ma rabtaa inaad ku sii wadato saxeexa Barnaamijka?"

1. Doorro Maya si aad ugu laabato shaashada Kudar Gelitaan Cusub.
2. Haddii ay suuragal tahay, sax tookennadaada Fob.
3. Haddii aadan sixi karin tookenada Fob, doorro Haa. Kani hadda waa gelitaan aan waafaqsanayn EVV. Raac [Kudar Gelitaannada Taariikheed adoo adeegsanaaya Barta Webseedka.](#)
4. Raac talaabooyinka haray ee hawsha Kudar Gelitaan Cusub.



Fiiro gaar ah: Haddii marka aad gelinayso gelitaanka fob, aad hesho digniin kale oo sheegaysa inaad jebiso xeerka ganacsiga, taasoo saxaysa cilada ka dhalan karta badelida wakhtiyada bilowga iyo dhammaadka ama taariikhda adeegga. Haddii wax kamid ah ciladahaan ay dhacaan, waxaad u baahan doontaa inaad badesho gellitaanka aadna ka dhigto gelitaan taariikh lasoo dhaafay aadna meesha ka saarto koodhadhka fob. Raac [Kudar Gelitaannada Taariikheed adoo adeegsanaaya Barta Webseedka.](#) Si aad xog badan uga ogaato ciladaha marka aad abuurayso gelitaannada barta waalidka, eeg [Gelitaannada Taariikhda – Su'aal iyo Jawaab.](#)

Ku Darista Gelitaannada Taariikhda Barta Gelitaanka

Mararka qaar, waxaad u baahan kartaa inaad ku darto gelitaanka wakhtiga kadib tookadaada shaqada. Tan waxaa loogu yeeraa "Gelitaanka Wakhtiga Taariikhda". Gelitaannada wakhtiga taariikhda ayaan waafaqsanayn EVV waana in keliya loo adeegsadaa haddii wax kaa hor istaagaan inaad geliso wakhtigaaga adoo adeegsanaaya mid kamid ah qaababka kale, sida inaad haysan khadka internetka ama aad iloowdo inaad geliso saacada bilowga shaqada.



Si aad ugu darto gelitaanka wakhtiga taariikhda, ka dooro Kudar Gelitaan Bogga hore.



Si aad ugu darto Gelitaanka Wakhtiga Taariikhda, buuxi godadka soo socda:

1. Nooca Acoonka:
Saacadii
2. Macaamiil:
Magaca
Macmiilka
3. Koodhka Adeegga:
Koodhkaan waa inuu si otomaatig ah u abuurmaa si uu u waafaqo waxa lagu ogol yahay macmiilkaas. Haddii macmiilku dhawaan baddelay barnaamijyada, dooro koodhka adeegga oo sax ah saleynaayo

4. Taariikhda Adeegga: Taariikhda aad shaqeysay
5. Is xaadiri: Biloowga tookada shaqada
6. Kabaxid: Dhammaadka tookada shaqada
7. Habka EVV: Saxiixa Barta oonlaynka ah



Koodhadhka Sababta:

Koodhadhka Sababtu waxay gacan ka gaystaan inay sharxaan sababta gelitaan uusan u buuxin shuruudaha EVV. Dooro Koodhka Sababta ee sida ugu dhow u sharxaaya sababta aadan u awoodin inaad adeegsato qaabka gelitaanka wakhtiga waafaqsan EVV. Ka dooro Koodhadhka Sababta ee ku biloowda erayga Provider (Adeeg Bixiye).

Ku darista Koodhka Sababta

Foomka Kudar Gelitaan Cusub:

1. Dooro calaamada ku darta ee buluuga ah oo ku xigta erayga Sababta.
2. Ka dooro Koodhka Sababta liiska hoos ka soo baxaaya ee ku biloowda Provider (Adeeg Bixiye).
 - a. Haddii aad doorato Provider-Other (Adeeg bixiye-Kale), qaybta sharaxaada ayaa soo baxaysa si aad ugu darto sharaxaada sababta aad u abuurayso gelitaankaan taariikhda ama aad wax uga badelayso gelitaanka.
3. Dooro calaamada kudarta ee buluuga ah oo midigta ka xigta erayga Sababta. Waa **inaad** doorataa tan si aad u kaydiso koodhka sababta.
4. Dooro Haa.

The image shows a multi-step process for adding a reason code. Step 1: A form with a date field 'Taariikhda Kabixida: 05/22/202' and a 'Sababta:' field with a plus icon. Step 2: A dropdown menu for 'Kudar koodhadka Sababta' showing a list of codes like 'Dooro Sababta', 'Provider-Clocked In/Clocked Out Mistakenly - ProvCICOM', and 'Provider-Other - ProvO'. Step 2a: A sub-form showing 'Kudar koodhadka Sababta: * Provider-Other - ProvO' and 'Qoraal Kudar: * Kudar Qoraal'. Step 3: A confirmation dialog box titled 'Kudar Koodhka Sababta' with the message 'Ma hubtaa inaad rabto inaad ku darto koodhka sababta - Provider-Forgot to Clock In/Clock Out - ProvCICOF' and buttons for 'Maya' and 'Haa'. Step 4: A callout pointing to the 'Haa' button in the confirmation dialog.

Si aad u Xaqiijiso Waxaad ku dartay Koodhka Sababta

Kadib marka aad doorato Haa si aad ugu darto koodhka sababta, waxaad arkaysaa koodhka sababta oo ka soo baxaaya Koodhadhka Sababta Lagudaray. Haddii aadan u jeedin koodhkaaga sababta oo ku jira qaybta Kudar koodhadhka Sababta, koodhka sababta ayaan si guul leh loogu darin.



Si looga Saaro Koodhka Sababta

1. Dooro calaamada kaharta ee buluuga ah ee ku xigta koodhka sababta.
2. Hadda waxaad ku dari kartaa koodhka cusub ee sababta adoo raacaaya talaabooyinka ku qoran boggi hore.

Sababta: -

Kudar koodhadka Sababta: * Dooro Sababta

Koodhadhka Sababta Lagudaray:

Magaca	koodh	Qoraal	Ficillada
Provider-Forgot to Clock In/Clock Out	ProvCICOF		

Kadib marka aad ku darto Koodhka Sababta, u dhameystir gelitaankaaga sida soo socota:

1. Kudar Qoraalada iyo Lifaaq. Tani qasab maaha - fadlan raac dhammaan xeerarka quseeya sharaxaadaha tookada.
2. Tigsaar xaqiijinta si aad u xaqiijiso in wakhtiga aad gelisay uu sax yahay.
3. Dooro Keydso.
4. Dooro Haa.

Qoraalada: Kudat Qoraal loogu talagalay Saacadaha-shaqo

Lifaaq: Choose File

Qoraalada: * Time is correct. Falsifying may be Medicaid fraud

Jooji Keydso

Digniin

Ma hubtaa inaad rabto inaad kudartid saacad shaqo cusub loogu talagalay **02:00 saacad(yada)** loogu talagalay **Pete Wentz - FOB1999** loogu talagalay **May 22, 2023**?

Maya Haa




Gelitaannada Taariikhda - Su'aal iyo Jawaab

Ka waran haddii aan helo qoraal soo boodaaya oo sheegaaya in xeerka ganacsiga ee Baaqiga Haray ee Oggolaanshaha la jebiyay xili aan gelitaan taariikheed gelinaayay barta webseedka?

Kadib marka aad doorato Keydso, waxaad helaysaa Digniin soo boodeysa oo sheegaysa "Xirmadaada waxaa ku jira hal xeer jebin ama ka badan lamana keydin karo. Fadlan akhri xeer jebinnada hoose kadibna dooro Laabo si aad isbadello ugu samayso ama u joojiso gelitaanka." Qaybta hoose tani waxay ku tusinaysaa xeerka ganacsiga ee la jebiyay. Tani waxay qori doontaa liiska Oggolaanshaha Dhimman Hadhaaga.

Tani ayaa ka dhigan inaad iskudayayso inaad codsato saacado kabadan inta lagu ogol yahay inaad shaqeyso. Gelitaanka aad iskudayayso inaad keydsato ayaa ku gaarsiiyay heer ka badan saacadaha lagu ogol yahay lamana keydin karo.

Ka dooro Laabo digniinta. Intaas kadib waxaa lagugu celin doonaa foomka Kudar Gelitaan Cusub halkaasoo oo aad haysato dookh aad wax ka badeli karto cadadka wakhtiga aad codsanayso. Waxaad arki kartaa cadadka saacadaha kuu harsan ee ku jira foomka Kudar Gelitaan Cusub hoosta godka Taariikhda Adeegga. Badel wakhtiga biloowga ama dhammaadka si uu u noqdo mid waafaqsan Baaqiga Kuu Haray kadibna dooro Keydso markale.



Ka waran haddii aan helo digniin ku qoran salka hoose ee shaashada oo sheegaysa, "Wadarta qadarta saacada-shaqada kama badnaan karto 16.00. Waxaad gelisay 21.00" adoo gelitaan taariikheed gelinaaya barta webseedka?

Marka aad doorato Keydso, waxaad helayso digniin ka muuqata salka shaashada

ka saraysa batoonka Keydso oo sheegaysa, "Wadarta qadarta saacada-shaqada kama badnaan karto 16.00. Waxaad gelisay 21.00"


Tan ayaa ka dhigan inaad iskudayayso inaad codsato saacado kabadan 16 saacadood. Talaabadaan looma ogola OR PTC DCI.

Waxaad hadda haysataa dookh aad wax uga badeli karto cadadka wakhtiga aad codsanayso. Badel wakhtiga bilowga ama dhammaadka si aad u xaqiijiso in wadarta guud ee saacadaha aad ku codsatay gelitaanku ay ka yar tahay 16 kadibna dooro Keydso markale.

Ka waran haddii aan helo qoraal soo boodaaya oo sheegaaya in xeerka ganacsiga ee gelitaanka cadadka taariikhda dhammaadka xirmada ee Akoonka Adeegga la jebiyay xili aan gelitaan taariikheed gelinaayay barta webseedka?

Kadib marka aad doorato Keydso, waxaad helayso digniin soo boodeysa oo sheegaysa "Saacadaada shaqo wuxuu leeyahay hal ama in ka badan oo xadgudubyo ah lamana keydin karo. Fadlan dib u eeg xadgudubyada hoosta qoran oo riix Dib-u-noqo si aad wax uga beddesho ama u joojiso gelitaanka ." Qaybta hoose ayaa ku tusinaysaa xeerka ganacsiga ee la jebiyay. Kani wuxuu sheegayaa akoontada adeegga taariikhda dhammaadka gelitaanka saacadda.

Tani waxaa ku jira taariikhda ku qoran OR PTC DCI oo sheegaysa inaad hadda kadib u shaqeynaynin macmiilkaan. Ma awoodi doontid inaad geliso waqtiga taariikhda kadib taariikhda aad u gelisay maalinta ugu danbeysay ee aad la shaqeyso macmiilkaan.



Dib u celi ka dooro digniinta. Intaas kadib waxaa lagugu celin doonaa foomka Kudar Gelitaan Cusub halkaasoo oo aad haysato dookh aad wax uga badeli karto taariikhda gelitaanka aad codsanayso. Kadibna waxaad iskudayi kartaa inaad keydiso markale.

Haddii taariikhda hore ee aad gelisay xirmada ay sax tahay aadna u shaqeyso macmiilkaan, la xiriir Xafiiska Maxaliga ah si aad ugu sheegto inaad u shaqeyso macmiilkaan. Ku sheeg inay jirto taariikhda dhammaadka aalada OR PTC DCI. Xafiiska Maxaliga ayaa intaas kadib la xiriiri doona Kooxda Taageerada ee PTC si aad meesha uga saarto taariikhda. Kadib marka hawshaan soo dhamaato, waxaad awoodi doontaa inaad geliso waqtiga macmiilkaan.

Marka dib laguugu xiriiriyo macmiilkaa, si aad lacag ugu hesho waqtigaan, waa inaad gelisaa diiwaanka taariikhda si aad u soo sheegto wakhtiga tookadahaas.

Gelitaannada Ku dairsta Badka Barta Webseedka OR PTC DCI

Haddii aad bixiso adeegyo lagu xisaabsho badka, waxaad u baahan doontaa inaad u adeegsato Barta Webseedka OR PTC DCI si aad ugu darto gelitaannada badka. Gelitaannada badka waa in la gashaa Barta Webseedka OR PTC DCI. Qaashiyaha wakhtiga ee Fob ee wakaalada oo ikhtiyaari ah ayaa leh qayb lagula socdo badkakahor gelinka badka Barta Webseedka OR PTC DCI (haddii la doono). Uma baahnid inaad adeegsato xaashidaan wakhtiga. Xaashidaan Wakhtiga ayaan loo gudbin karin Xafiiska Maxaliga si lacag loogu dalbado.

Si aad u biloowdo inaad ku darto gelitaanka badka dooro Kudar Gelitaan.



Buuxi foomka Kudar Gelitaan Cusub:

1. Nooca Gelitaanka: Xirmada (caadiga ah)
2. Magaca Shaqaalaha: Magaca adeeg bixiyaha (otomaatig ayaa u soo boodayaa)
3. Nooca Akoonka: Gaadiidka Macmiilka
4. Macaamiil: Magaca Macmiilka
5. Koodhka Adeegga: Badka
6. Taariikhda Adeegga: bisha/maalinta/sanadka
7. Biloow Akhrinta Xawaare-xisaabiyaha: Geli 0
8. Dhamaadka Akhriska Xawaare-xisaabiyaha: Geli tirada maylasha aad codsanayso mudada Ogolaanshaha.
9. Doorro Keydso.

Fiiro gaar ah: Badka ayaa keliya u baahan in la gasho barta webseedka halmar xili mushaareed kasta.

Fiiro gaar ah: Si aad u akhrido bad sheegta, geli 0 iyo lambarka inta mayl ee aad dooneyso inaad codsato, ha gelin keliya tirada dhabta ah ee bad sheegta.



Kudar Gelitaan Cusub

Nooca Gelitaanka: * Saacada 1

Magaca Shaqaalaha: Patrick Stump 2

Nooca Akoonka: * Gaadiidka Macaamiisha 3

Macaamiil: * Pete Wentz - FOB1999 4

Koodhka Adeegga: * Mileage-1 5

Taariikhda Adeegga: * 05/24/2023 6

Qeybta Hartay: 10

Bilow Akhrinta Xawaare-xisaabiyaha: * 0 7

Dhamaadka Akhriska Xawaare-xisaabiyaha: * 5 8

Tirada Milyaasha La xisaabiyay: 5.00

Koodhka Baarista : Koodhka Baarista

Qoraalada: Kudat Qoraal loogu talagalay Saacadaha-shaqo

Lifaaq: Choose File

Jooji Keydso 9

Barta Webseedka OR PTC DCI Ka fiiri Gelitaan Bogga Hore

Waxaad si guul leh ugu darta gelitaan Barta Webseedka OR PTC DCI!

Waxaad ka helaysaa gelitaankaaga qaybta Gelitaanka.

Diiwaanadaada saacadlaha ah ayaa ku soo baxaaya xaalada sugitaanka. Tani ayaa ka dhigan in nidaamku uu hubinada qaar samaynaayo si loo xaqiijiyo in

gelitaankaagu waafaqo dhammaan shuruudaha. Gelitaannada ku jira xaalada sugitaanka ayaa ah keliya gelitaannada ay sixi karaan adeeg bixiyaashu. Gelitaannada wali ku jira marxalada Sugitaanka kadib dhammaadka mudada mushaarka ayaan la bixin doonin. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan marlaxadaha kale ee gelitaanka eeg [Gelitaannada Abka Moobilka](#).

The screenshot shows the 'Gelitaanka' web application interface. At the top, there is a navigation bar with the user's name 'patrick.stum...' and the language 'Soomaali'. Below this is a search form with several input fields: 'Laga bilaabo (MM/DD/YYYY)', 'Ilaa (MM/DD/YYYY)', 'Qor Aqoonsiga Saacada-shaqo', 'Qor magaca maacmiika', 'Qor Koodhka Adeegga', and 'Dooro Nidoca AKoonrada'. There are also buttons for 'Dib-u-beegid' and 'Raadi'. Below the form is a table with columns: 'Aqoonsiga', 'Taariikhda adeegga', 'Nooca', 'Nooca AKoonka', 'Lifaaga', 'Magaca Maacmiika', 'Koodhka Adeegga', 'Qaddarka', 'Nooca Qeybta', and 'Xaaladda'. The table contains three rows of data, with the second row highlighted in orange. The 'Xaaladda' column for the second row contains the word 'Sugaya'.

Webseedka Moobilka OR PTC DCI

Waxaad ka geli kartaa Barta Webseedka OR PTC DCI aaladaada moobilka. Kan waxaa loogu yeeraa Galka Ogolaanshaha!

Gelitaanka Webseedka Moobilka OR PTC DCI

Si aad u gasho Webseedka Moobilka OR PTC DCI:


1. Fur baroowsarka taleefankaaga (Safari, Chrome, iwm.).
2. Gal barta: orptc.dcisoftware.com.
3. Ku gal Magacaaga Isticmaalka iyo Lambar sireedka/BIINKA.
4. Dooro Gal.



Fiiro gaar ah: Haddii aad isla aaladaan u isticmaali doonto gelitaankaan, dooro godka Ixusuuso si aad u keydiso magacaaga isticmaalaha.


5. Akhri Cadeynta Bixiyaha kadibna dooro Waayahay.
6. Akhri Ogeysiiska Isticmaalka Nidaamka kadibna dooro Waayahay.

- Marka aad gasho bata, dhammaan boostiyada wararka ayaa kasoo bixi doona shaashada hore. Waxaad dooran kartaa mid kasta si aad u aragto faahfaahinta ama raadi kuwo kale si aad u akhrido dhammaan boostiyada wararka.






Gelitaanka Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI

- Geeska midig ee kore ee shaashada, waxaad ku arkaysaa sadex layn oo toosan. Kani waa calaamadaada dookhyada.
- Marka aad doorato dookhyada, waxaad arkaysaa dookhyada soo socda:
 - Bogga hore
 - Gelitaan Cusub
 - Hubinta Ogolaanshaha
 - Gelitaanka
 - Fariin
 - Raadi
 - Ka bax



Ku darista Gelitanka Xirmada Cusub ee Webseedka Abka Moobilka OR PTC DCI

1. Si aad ugu darto Gelitaan Cusub, ka dooro Kudar Gelitaan Cusub dookhyada.
2. Buuxi foomka Gelitaan Cusub. Xaqiiji in nooca xirmadu tahay saacadleey.
3. Biloow inaad ku qorto magaca isticmaalahaaga godka Macmiilka, kadibna dooro magaciisa marka dookhyada hoose soo baxaan.
